WardheerNews
NEWS FROM AFAR!

# Sahankii Richard Buton ee Bariga Afrika Cutubkii 6xaad

## KURAHA SAYLAC ILAA BANCAWSEEDKA MARAR

**Tarjume & Tifatitre Boodhari Warsame**

**May 14, 2016**

---



Hadda ayaan gacaliye L[umsdenow] ka baxay aagga hore ee gubanta si aan ugu baxo oogadada, waa halka ay ku soo ekaadaan silsiladda burralayda Itoobiya ee marka ay ka kacaan Tajorre dabadeed qoolaab u hareereeyaan marsada Saylac, markaana Hargeysa kaga soo dhaca xagga silsiladda buuraha ah ee dacalka ku haysa xeebta Soomaaliyeed. Silsiladdan waxaa deggennaa taariikhda la xasuusanyahay saddex dadyow oo kala duwan. Gaalla [Oromo], Muslimiintii hore ee Adal [Awdal] iyo Soomaalida hadda jirta. Si ay ahaataba se, sida caadada ka ah Bariga, ma leh magacyo guud[1]. Buurahani waa qurxoonyihiin. Ruuggooda hoose ee aan qaabka wacnayni wuxuu ka koobanyahay dhagaxdixeed ay ka fulaan xididdo dhagaxmacdaneed ah iyo mooseyaal dhagaxbaruur kan ugu saafisan ah. Waxaa ka korreeya dhaaracyo dhagaxciideed iyo malaas isa saaran ah oo midabbadu dhankan casaan, xaggoona hurdi ama dameeri dahsoon yihiin. Aalaa, si la yaab leh ayay u marmaroora, ciiddii dhirtu ku bixi lahaydna dabaylo maansuun xooggan ah ayaa ka qaaday. Taagaggan oo badanaa fiiqyada kore muddullo figuhu goobo yihiin uga eg waxaa ku xiriirsan qarar iyo kooralay ay noocyo kala duwan oo guracyo ahi midabdaloolo iyo gacaar wiiqan ay sidii geedihii Saytuunka[2] ee buurihii Provence[3] ku yiil ugu hareeyeen. Xilliga qaboobaha waa abaar reerguuraaguna waxay uga guuraan oo u degtaan xagga gubanta. Marka roobka maansuunku naq cagaaran ka soo saaro ayay dadku ku soo laabtaan xeryahoodii ay hore uga guureen. Qorarku waa muuqaalka ugu ilqabadka badan ee meeshani leedahay. Meelaha qaarkood dhinacyadu qotton ayay u taaganyihiin, sidii derbiyo waawayn, ballacana waxay gaaraan 100

---

[1] Kur, fiiq, qar iyo tog walbaa sida uu u egyahay ayaa loogu magac bixiyaa. Sida, **Buur Cad, Libaaxlay**, iwm. Magacyaada la wada yaqaannaa ma qabatimaan rabitaanka bulsho ee dadka aan ilbaxa ahayn. – *[B]*

[2] Saytuunku waa kan Qur'aanku sheegay ee saliidda laga dhaliyo. Geedmirood kale oo Soomaalidu magacaa u taqaan ayaa jira (Guava). – *[T]*

[3] Gobol koofur-galbeed Faransiiska ku yaal. Badda Mediterranean ayuu kulaalaa. Meelo kale oo magacan la wadaaga ayaa iyaguna jira. – *[T]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

yaardi ilaa mayl barki. Meelo kale gebiyada dhagxaanta soo taagtaagan ee salka ka qodmay ayaa sagxadda hoose tuuran, sida looga bartayna daliig dheer oo ciid cad ah ayaa laba jaamood oo doogga hulmanka emarool u eg ayaa dhexdooda fidsan. Waa muuqaal u ku doogsado aragga isha soo martay dhagaxmadowgii qallaylka guban ahaa ee Carabiyada Koofureed.

Geedka Gobka ayaa wuxuu kor ugu baxaa heer hoobaan Afrikaan jilaysa. Laamihiisa caleemaha leh dhexdooda ayaa shimbiro, sida nooca Salamadhlaha, midabbadooda baxsani casaan ifaya, hurdi iyo cagaar is labarogaya yihiin hadba dhan u duulayaan. Waxaan ka aqoonsaday nooc dib dheer oo Goobiyahan ama Fad la yiraahdo, nooc qoolley midab bunni rasan oo in yaroo hurdi casaan galay ahi ku daadsantahay leh, Shimbirmalabta dhexdhexaadka ah, Digiriiran, Yaryaro midabka Kaanneriga leh, Baalfalaadh sida kuwii Surinam u qurxoon, Xamarre baabul midab alxan u eg leh, iyo gaar ahaan, nooc indho cadcad leh oo Soomaalidu Shimbir Lo'aad ku magacaabaan. Geedsaaq Carmo caleemo waawayn oo dhacaan la dibbirsan midakooduna isugu jiro doog dhadsan, guduud, ama casaan furan iyo rucubyo miro ah oo sidii canab basali ah u eg ayaa togga xaradh silloon ku dhigay. Noocyo badan oo tiin qaarkood dhererarka 30 ila 35 cagood[4] kor u baxo ayaa iyaguna ka buuxa meesha. Midkood ayaa si gooni ah la iiga warramay. Soomaalida caamada ahi waxay ku magacaabaan Gawracato kuwa xoogaa wax bartayna Shajarat al-Zaquum[5]. Waa mandrake-ga carrigan, doobbooyinkiisa kuukuusan ee laamihiisa cacayilan dhakada sare kaga yaalna waxay u egyihiin madaxyo iyo wajiyo dad.

Maalin arbacaad, 15[kii] Diseembar, ka dib habeen inta uu dhedo ka qabo dharkeennii qoyay ayaannu 12 saac oo aroornimo kaakacnay bilownay in aannu Waadiga Dharkaynlay ee inta bari ka yimaada koofur qabta kor u raacno. Socod saacad ah dabadi ayaa waxaa soo muuqday qabri taallatiirriyaad yar leh oo dhagxaantiisu aanay sinnayn oo Siyaaro ama Mazaar la yiraahdo, kaa oo qof walbaa si uu u karaameeyo uu qori saaray. Abbaanku wuxuu fikraddiisii ku sheegay in Awliyo ama rag karaamaysani ay halkaa waa degeen, laakiin Yowmul Qiyaame ayaa si caqli kaashatay u sheegay in meeshu ay ahayd meel Gaalla hore sanam ku caabudi jirtay ama curraafaysi uun iska ah. Haddana waxaannu soo gaarnay dudumooyin Aboor cad dhisay, muuqaal Afrika dhankeedaan caan ka ah. Halkan dhulku wuxuu u egyahay sidii qabuuro Turki oo ciiddaa ka badan, waxaana la mooddaa magaalo burburtay. Meelaha qaarkood udbaha [dudumooyinku] waxay isugu dhoonmeen sidii wax gaaguur shinniyeed u eg, meelo kalena waxay isugu baxeen sidii daashkii[6]. Isla markaa, badankkooda waxaa deday dhir, geedsaaqa midabbada qayaxan leh ee ku dhafmayna waxaa la moodaa haraadiga fagaare dooggu simay. Guud ahaan dudumooyinku waxa ay leeyihiin qaab kor u dhuuban oo 4 ilaa 12 cagood dhererka u dhexeeya. Boqollaal ayaa laga tiriyaa carrigan, Soomaaliduna waxay tiradan badan u saareen iyada oo cayayaanku godadka

[4] Feet (wadarta 'foot' ama cag). Cagtii waxay u dhigantaa 12 sentimitir. – *[T]*
[5] Geedkii belada qabay ee Naarta aakhiro lagu sheegay ayaa loogu magac daray. Waa kan Aayaddu dhigayso "[…] Inna Shajarat-il-Zaquumi dhacaam-ul-athiimi… (Ilaa dhammaadka Aayada)". – *Tarjume*
[6] Dhisme guriga irdidihiisa sidii hoosadii ugu qabsan oo tiirar dhowr ahi hayaan. – *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

ka guuro xilliga abaarta dabadeedna uu mid kale dhismaheed bilaabo.

Dudumooyinkii hore ee duqoobay dabayl iyo roob ay u dheeryihiin bawne iyo dabagaalle hoosta ka qoday ayaa xalleefyo sii xoodmaya ka soo reebay. Samayska oo dirri habaas hurdi ah oo celyada aboorku isku malaastay ah ayay adagtahay in la jebshaa. Waxaa sidii shabaq uga dulduleela shax dhuumo yaryar leh. Dudumooyinkaa Togga Dharkaynle ayaan markii iigu horreysay ku arkay. Xagga carriga gudaha ah way ka waawaynyihiin kana balballaranyihiin kuwa degaannada xeebta.

Dixdii ayaannu kor iyo jiho koofureed u sii raacnay ilaa labadii saac ee subaxnimo, markaa oo hageyaashii naga saareen godantii hoose. Waxay fisheen in ay muggaa Gadaabursi is haleelaan, baqdintii ay la dhadeenna waxaa u weheliyay iyaga oo qarqaryo iyo gaajo la gariirayey. Wadatashi xasaasi ah ayaa gorodda la is gashaday. Nin Cali la yiraahdo, naynaastiisuna ’Dhuuso’ ahayd oo maaddaama cunno, cabbid iyo in uu dabka kulaalo mooyee aan waxba kale qaban ayaa go’aansaday in uu naga goosto. Si ay ahaataba se, maadaama uu maro khidmo u qaatay bareerahaas si qayaxan ayaannu ugu diidnay. Markii aannu muddo laba saacadood ah ku jirnay dhul inta uu meermeer ka qabo wax saddex mayl ka badan aannaan jarin ayaa hageyaashayadii geed xero laga guuray u dhaw hoosti ku nasiyeen, meel lagu magacaabo Ceel Carmo ama xifaale ahaan Dabadhalaashay [?] Marka Damal laga qiyaas qaato waxay dhacdaa S.W. 190° [Koofur Galbeed 190 darajo]. Badwidayadii mid ka mid ah oo baqal fuushan ayaa hore ciribta ugu sii dhuftay, si uu xog u soo ururiyo sibraar biyo ahna noogu soo dhaansho. Yawmul Qiyaame ayaan wayddiiyay warka ay filayaan. Wuxuu iigu jawaabay maahmaahda ah ’War waa nolol!’ Bedwida Soomaalidu xiise badan ayay u hayaan waxa dunida ka socda. Degaannadan aadka cidlada u ah dadka oo dhammi socotada ayay daba dudaan. Qof socoto ahi degmo ma dhaafo isaga oo aan waranka dhulka ku mudan oo aan jawaab u helin su’aalo badan oo xogwaraysi ah. Intii xogi dhaafi lahayd badwigu xataa dumar waa uu waraysanayaa. Sidaa ayaa warku meel walba ku gaaraa. Gadaabursiga reer miyiga ah waxaa xiise u lahaa dagaalkii Ruushka[7], Hararna waxaan ka maqlay duufaan xooggan oo Marsada Bombey maraakiib ku burburisay, se warku waa dhawr todobaad dhacdada dabadeed.

Badawigii sibraar maran buu la soo laabtay, wuxuu se waday qorshe dhan. Waxaan wax kaaga sheegi doonaa, gacaliye L[umsdenoow], shir ay tahay i uu ka markhatikaco tiraabta ah in barbariyiinta oo dhammi ay wada aftahanno yihiin. Demosthenes[8] aayarki ayuu daabbaddii ka degayaa, hore ayuu u soo dhaqaayayaa, xoogaa ayuu inta lugaha is dhaafsado istaagayaa, waa habka istaag loogu jecelyahay dhulkan e, isaga oo labada gacmood laba waran oo dhulka mudan ku cuskan. Sidaa ayuu kadaloob ugu dhacayaa, dhinacyada dadammoonayaa, candhuuf tufanayaa, taqsiinta tubaakada ah dhagta dabadeeda gashanayaa, hubkiisa horta dhiganayaa, dhenged yar qaadanayaa, oo dhulka inta xarriiqo ka jeexjeexo haddana aayar u masaxayaa. Dhulka in xarriiqo laga

[7] Dagaalkii **Crimea** (1853-1856). Xulufo ka koobnayd Faransa, Boqortooyada Ingiriiska, Boqortooyadii Cismaaniyiinta iyo Sardinia oo isku dhan ahaa iyo Ruushka oo ka soo hor jeeday. Ruushka ayaa lagu jabshay dagaalkaa. – *[T]*

[8] Aftahan iyo hoggaamiye caan ka ahaa Giriiggii hore. *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

jeexo nuqsi ayaandarro leh ayaa loo haystaa. Dhegaystayaashu qoolaab furan ayay dheg raaricis u fariistaan, iyadoo warmahoodii oo dhulka qoton u mudanina caaradahooda cadcad giraanno ilays cillan ahi ka walac leeyahiin. Dhulka ayay wada kadaloob u fariistaan oo indho u eg in ay shafafka kaga yaallaanna toos wajigiisa ugu eegayaan ninka warramaya, iyaga oo ka qooraansanaya gaashammadooda dushooda, sidii qoomkii Blemmyes[9]. Markii warka in la dhuuxo diyaar loo noqdo ayuu ninka hormuudka u ahi waraysanayaa.

’Maxaa aad war haysaa?’

Warramihii ayaa horta uga bilaabaya arrinta muhiimka ah ee in uu ceelkii isa sii taagay ah. Sidaan soo socotana waa ugu xijinayaa, isaga oo mararka qaarkood codka ilaa lix nudood kor ugu dheeraysanya, si joogto ahna dhulka hortiisa ah u jugaynaya.
’war wanaagsan, Ilaah idanki!’ ayuu kaga jawaabayaa su’aashaa hore.
‘waa sidaa !’ayay dhegaysteyaashu kaga guraan, iyaga oo codadka kala beddelaya ama, aan iraahdee, giisaya.
‘Waa anigii saaka faraskaygii kooraystay.’
‘Waa sidaa!’
‘Waa anigii aniga oo ka dhakoola idin ka tegay.’
‘Waa sidaa!’
‘*Halkaaa!*’ (isaga oo cod dheer oo xooggan ku tilmaamaya, jihadana ul ku fiiqaya).
‘Waa sidaa!’
*‘Halkaaa* waa anigii qabtay.’
‘Waa sidaa!’
‘Kaynta ayaan sii dhex jibaaxay.’
‘Waa sidaa!’
‘Cammuudii ayaan sii dhex waarwaarriyay.’
‘Waa sidaa!’
‘Hadde innaba baqdini igu ma jirto e ogaada!’
‘Waa sidaa!’
‘War yaanan kugu daaline, raadad xoolaad baan ku soo baxay.’
‘Hoy! Hoy!! Hoy!!!’ (aammus yar ayaa ka dambeeya la yaabkan dhegataagga leh).
‘Waa ay qoyanaayeen [raadadku waa cusbaayeen].’
‘Waa sidaa!’
‘Digaduna sidoo kale.’
‘Waa sidaa!’
’Raad haween baan ka dhex aqoonsaday.’
’Waa sidaa!’
’ Geel se lagu ma arag.’
’Waa sidaa!’
’Ugu dambayn waxaan arkay qoryo.’
’Waa sidaa!’

[9] Dad (ama boqortooyo) la sheegay in ku noolaan jireen **Nuuba iyo Kuush** xilliyadii Roomaanku Africa qabsaday. [*T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

‘Dhagaxyo haddana’
‘Waa Sidaa!’
“Haddana biyo”
“Waa sidaa”
‘Oo waa ceel meeshu!!!’

Dabadeed shirkii ayaa si qummaan u furmaya, halkaa oo, sida Galbeedka durugsan ka dhacda, uu is muuijiyo inuu dhagaystayaasha dhagahooda qabsado ugu yaraan saacad, isaga oo aan wax la taaban karo  oran. Si ay ahaataba, faa’iidada ku jirta hadal iska *koobintoodu* waa in arrinta dhan walba laga eego oo la kala waro waxa dhaca iyo waxa ka dhalan kara, hordhacyadeeda, xaqiiqooyinkeeda iyo waxa ka iman kara timaaddada intaba.

Waxay diyaar u yihiin in ay xal u helaan lamafilaan walba oo talo la’aani ku kedin karto.Inkasta oo kulbeeggu[10] sheegayay kulayl diraaceed, cirku daruur ayuu lahaa, gufaacooyin dabaylo ahina xagga buuraha ayay ka soo dhacayeen.

Ugu dambayntii, sagaal saac iyo bar markii ay saacadda galabnimo ahayd ayaa awrtayadii cagajiid lagu raray, dixdii aan ku joognay oo Galbeed Koofur-Galbeed uga baydhana hore cagta u sii saarnay. Saacad badhkeed markii la socday ayaannu soo gaarnay dooxo laasas leh. Halkaa ayay hageyaashii ku hakayiyeen, iyaga oo ka aalli waayay markii ay u jeedeen koox dhallinyaro iyo kurayo yaryar ah oo qubaysanaya, go’yaashoodiina mayranaya. Dhammaan,  dad iyo duunyaba harraad ayay asqo la ahaayeen. In badan oo naga mid ahina quruurux ayaannu muudsanaynnay subixii oo dhan[11]. Sidaa oo ay ahayd, haddana, baqdin ay baryo Tubaako ka  qabeen darteed ayay badawidu safarka sii wadi lahaayeen, haddii aanan anigu ku dirqin in ay goobtaa ku furaan. saddex laas oo ciidda ka qodan ayaannu halkaa ugu tagnay. Midi waa guray, midina waa biiroobay, kan saddexaadna xagaf biyo  ah oo 20 ilaa 25 cagood dhulka hoostiisa jira ayuu lahaa. Inan ayaa biyaha dhex istaagay oo inta  hadba gorof soo daro mid kale oo meel dhexe ku naban u soo tuuraya, kan dambe ayaa isaguna mid ka sarreeya u sii dhiibaya, kaa kale ayaa isaguna markiisa inta uu qarka ka dhufto biyihii oo markaan qaybi qubatay  qabaal harag ah oo darka yaal ku shubaa. Saacad barkeed muddo ku dhow ayaannu hakannay si aan dad iyo duunyaba u waraabinno, dabadeedna safarkeennii ayaannu waadigii kor u sii qaadnay oo kaga bayrnay meel qoorato toosan ah oo qalqallooca joogtada ah ee dooxada lagaga maarmo. Qooratadaasi waqti yar uun bay noo baajisay. Dhulku dhagax ayuu ahaa, taagag aan sinnayn ayaa awrtii daaliyey, lugaha iyo cagahana waxaa na jeexjeexay qodxaha dhirta ee warmaha la moodo. Halkan dhulka waxaa aad uga baxay dacar  mararka qaarkood dhererka lix cagood gaadha, midabkuna basali iyo cagaar dahsoon yahay. Laamuhu si qurxoon ayay xagga dhulka ugu soo gandoodaan, sidii udbihii Corinthians[12], iyaga oo hagoogan gambaleello midabo baxsan leh, ay se si naxariis darro ah uga buuxaan

[10] *Thermometer* waa qalab heerkulka cimmilada kulayl iyo qabow lagu cabbiro. – *[T]*
[11] Dhagax yar oo finiin la’eg ayaa carrabka hoostiisa lagu qabtaa marka oon daran laga baqayo. Sida ay u badantahay xigmaddu waa in qofka afku aanu ka dhacaan beelin oo aanu qallalin. – *[T]*
[12] Corinthians (Corinth) waxa ay asal ahaayeen dad Giriiggii hore ahaa. –*[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

qodxo adadag iyo caleemo dhinacydu miishaar yihiin. Waa halka ay ka baxdo Xigta mudaceedu adayg iyo caarad dhubbnaan inta uu ka qabo  aanay farduhu mari karin, iyada cutubyo kuwooda ugu waawawyn uguna cufan u qodqotoma. Jaleelo ayaa iyaduna gowyada si aan loo meel dayin ugu yaacsan, Ushriga qarada wayn ama Dhufeeco (Suuf Jin) ayaa isaguna xaygiisa dhadhaabta iyo quruuruxa togga daadsan dushooda ku qubay. Gacanyareyaashaydii waxay shaqo ka dhigteen soo ururunta abqo la cuno oo geed Qurac la yiraahdo ka baxda, intii aan aniguna deegaanka daawanayay. Dudumooyin aan kala go' lahayn ayaa meel agabbar ah u ekaysiinaya sidii dhul la degganyahay oo wali masaajiddii iyo qabuurihii Awdashii hore ay cammireen. Qaabka dhulku si aayar aayar ah ayuu isu beddelay, godeenno iyo hoobadyo waawayn ayaa markan beddela taaggaggii madaxdhuubta  isku xoonsan ahaa ee gobollada hoose.

Qorraxdu markii ay galbeed ku libidhay ayuu Guuleed Dheere aad uga cawday dhaxanta qabow ee kuraha ka soo dhacaysay. Tuulooyin badan oo aad ku garato cida eyda iyo aryaha sii foofaya ayaannu soo marnay. Raagihii caraysnaa, oo si ay ahaataba hadda singal na la socda noqday, isagu degmana ma aadin libaaxyada bannnaanka joogana ma dhex degin. Hore ayuu noo sii tukhaantukhiyay ilaa aan ka soo gaarnay bohol God lagu magacaabo oo aannu kaga hoyannay jabad laga guuray. Awrtayadii oo caq ku dhow aadna ugu daalay siddeed mayl oo geeddi ah ayaa halkaa si dedeg ah rarka loogaga dhigay. Intii aannu aqalka dhisanaynnay ayaa waxaa nala soo wareegay dhowr Gadaabursi ah oo isku deyay in ay Abbaankayaga qafaashaan, iyaga oo ku andacoonaya in ay neef lo' ah ku leeyihiin. Waxaannu si geesinnimo leh ugu jawaabnay in uu hadda annaga magan noo yahay. Haddii ay hadallo kulkulul nagu la dheeraysteenna bastoolad ayaa dushooda laga riday, taa oo ay dabadeed sidii eydii uga gabbaddeen. Dab belalaya, casho kulul, sariiro diirran, abxado waawayn oo buuxa iyo sheekooyin maad leh ayaa si dhakhso leh himmaddii saffarraydayada ee sii liicaysay dib u soo nooleeyay. Habeen qumman markii ay u hoobatay ayuu dayaxii kala firdhiyay ceeryaamo culus oo inta daruur isugu ururtay roob ka dhowaa, gabadanadiina si la dareemi karo u yaraatay. Dhedo yar ayaa jirtay, si wanaagsanna waannu u seexan lahayn haddii dameerahayagii gaajaysnaa ayan sidoodii rablayn iyo baabbacayn isku darin oo ilaa waaberigiina is cayrsan lahayn.

Diseembar 6 ayaannu arooryo dambe toosnay, si aannu dhaxanta subax uga nabadgalno. Hal saac oo subaxnimo ayaannu dhul adag ku sii daynnay annaga oo quuddaraynay in aannu waraqyada hoose subaaxaa sare uga baxno. Laba mayl markii aannu sii xamaaranaynnay ayaa awrtii oo socod holi wayday shafka dhulka la wada dhacday. Dabadeedna annaga oo aan rabin ayaannu ku furnay Jiyaf [?], godan dooxada Dhoobo ka hoseeysa. Halakan xoolo caddaankoodu buuraha firirsanyahay iyo haad hawada heehaabaysa ayaa noo muujiyay ifefaalaha ah in aannu degmo ku dhawnahay. Aqalkayagii waxaa dhakhsaba soo buuxshay Gadabuursi  wajiyadu sulub yihiin oo badankoodu ahaa lo'jir, sida dhaqanka bulshadoodu dhigayo, go'yaashoodii sidii cimaammad luqumaha ku martay. In aan degmadooda soo booqanno ayay naga baryeen, waxayna noo ballanqaadeen in ay neef  lo' ah naga siinayaan liibaaxii walba ee aannu Buurta Libaaxlay ku dilno. Waa ka xumayn in aannaan wakhti u hayn. Dhallinyaradaa waxaa ku xigay rag iyo dumar waday caano oo kaxaynayay ido iyo


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

riyo maaddaama cawsku gabaabsi ahaa ay iib cirmar ah ku doonayeen. Waxay ku doonayeen 18 baac oo maro Cutch ah neefkii ido ah, qarshashada subagga ahna laba [baac] oo maro suufka lafcidhka ah. Waxaa ku jiray dadkaa waji qurxux dhab ah leh kii ugu horreeyay ee aan carriga Soomaaliyeed ku arko. Madaxa si wacan ayaa loo abuuray, si xallad lehna loogu qotomiyay luqun dheer oo dhuuban iyo garbo isu dhow. Timaha, sunniyaha iyo sanka laga ma sheekayn karo. Indhuhu waa dugul madow oo qaab qaanso u xaglinaya, wajiguna waa dabacsanaan *miskiinnimo* xad-dhaaf ahi ka muuqato oo xoogaa bushimo waawayni Afrikaan daartay. Midabkeedu dhab ahaan soo jiidasho ayuu lahaa. Waa maarriin tikh ah oo dhulalkan falaaddo ka leh, laafyaheeduna waxay lahaayeen qurux tilmaamaysa addimo si fiican isugu dheellitiran. Miskiinta hu'geedu waa uun gambo timaha gadaal u haysa, maro si qaab daran laabta ugu dedan iyo googarad dhuu ah oo aan qornaan qumman u kordhin. Waxyaalaha ay isku qurxinaysaa iyaguna sidaa wax ma dhaamin. Sindiyad iyo dhego macdan ah oo tumaal sameeyay, kuul dhoob cad ka samaysan iyo xayn xirsiyo maqaar fasakhmay oo madoobaaday ku tolan wax uma dheerayn.

Quruxdeeda si aan u xuso ayaa waxaan siiyay maryo, tubaako iyo wax yar oo milix si dedeg u qaaliyoobaysay ahayd. Saygeedu waa ag taagnaa, in kasta oo ka heliddeeda la muujiyayna caro ama se hinnaase midkoodna ma aanu muujin. Waxay ku abaalgudday in ay caano noo keento ambabaxa subixii dambana naga kaalmayso.

Habeennimadii ayaannu saddex rati oo hor leh kiraysannay[13], si ay alaabada taagga kore noogu sii qaadaan. Waxaan kale oo dilannay ugaar kalaankalkeeda loo bogay. Yawmul Qiyaame ayaa ku adkaystay in uu xabbad kor u rido, si uu libaaxyada gurxankooda aan habeenka laga ladi karin aan se marnaba la arag ugu didiyo.

Qabowgii subaxa ayaa aad u soo batay, ilaa laba saac oo subaxnimo la gaarayna ma aannaan dhaqaaqin. Qiyaas ahaan saacad barkeed markii aannu dooxada kor u sii raacnay oo aannu ku soo dhacnay karin babacyo dooggan oo hal irrid ah loo maro meel buuraha dhexdooda ah ayaannnu kaga leexannay meermeer dhex mara toon xiran, geed qodxeed iyo dhadhaabbo qara waawayn leh dhanka bidix. Derbiyada qarka ka soo hor jeeda waxay ahaayeen kuwo aad u qotommo dhaadheer, meelaha qaarqkoodna waxay ku lahaayeen dhaaracyo lakabyo isa saaran ah, meelo kalena waa sibsib adag oo biyadhac iyo badowlaho masaxeen. Maaddadda ugu badan ee ay meeshu ka samaysantahay waxay ahayd dhagaxdixeed adayg iyo qalafsanaan inta uu ka qabo ay dhagaxdhuxul baaliyoobay, dhagaxbaruur iyo dhagaxmacdaneedku ay cadad qof suulki lale'eg u kala daateen. Jajabka dhagaxmacdaneedka ah oo milicda ka dhex bidhbidhaamaya ah iyo dhagaxciidyo kala duwan ayaa iyaguna meel walba tuuran. Wadadddu dhib bay nagu markaday, awrtuna mar walba rarka waa dheelliyaysay. Waxaan ka fursan waayay in aan baqalkaygii ka dego, markii aan

[13] Waxa aannu bixinnay [saddexda rati] maro 24 baac oo bafto ah iyo tan suufka buluggaa ah oo laba ah, qiyaasta waxay isku ahaayeen saddex shilin. – *[B]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

dhulka salka dhignayna waxaa qaniinyo nagu boobay nooc quraanyo waawayn madmadow oo dhulkan ka buuxda ah[14].

Markii aannu kala badh waddadii kor u sii tafnay ayaannu u tagnay laba taallotiirriyaad oo qabriyo ah. Qorisaarkeennii ayaan ku biirinnay, sida Soomaaliga wanaagsani yeelo. Laba saacadood iyo shaqo culus dabadood ayaannu dabadeed u baxnay fig calaan ah, saacad kalena waxaannu joognay sallaha bannaan ee buuraha dushooda ah. Halkani waa aagga marxaladda labaad laga galo ee dhulka Bariga Afrika[15]. Gadaashayada waxaa dhacda gubantii  oo dirqi nooqu muuqata, dhulka godanta ah ee buurta ruuggeeda dhacaana waa balaarranyahay, dhulka sii hoose ee baaxadda waynna ceeryaamo ayaa qarisay. Oogada  naga horreysa waa dhul aad u baaxad wayn oo dalidhacyo taxan ah, marka xagga galbeedkana loo aadana xoogaa kor u yara kacsan. Midabku waa ciiro dhir teel ahi ku taal, kalarog  walba oo kax ahna hoostiisa waxaa mara durdur biyamareen dhagax ah oo xagga koofur-galbeed waqooyi-bari ugu shuba.

Dhulkan waxaa aad uga baxa dacar tiro badan oo isku murugsan, qodax qallafsan iyo geedo waabay[16] cukan ah. Waa khasab in  mar meeshan dad deggenaa . Qabuuro iyo guryo Muslimiin hore lahaayeen ayaa burburkoodii buuraha iyo qararka daadsanyahay. Abbaarihii duhurka ayaannu soo gaarnay kob Qabri Kaafir la yiraahdo. Waa meel ay ku hareeraysanyihiin dhagxyo aan qaab lahayn oo afargeesyo dhinaciiba 100 yaardi dherer la’egyahay ah. Sheeko waxaa lagu hayaa in nin Misr la oran jiray oo ugaas Gaallaad [Oromo] ahaa uu markii uu sii dhimanayay amray in meesha todoba goor laga buuxiyo halo geel oo axankiisa ah. Halkani waa marxallada afaraad, marka waddada tooska ah ee Saylac ka baxda ee Harar qabata lagu yimaado. Toban maalmood ayaa sidaa nagaga tegay, biyo iyo caws la’aanina waxa ay na badeen inaan gaadiidkeenna u baqno. Awrtu dirqi ayay ku dhaqaaqaysay laf-dhabarta baqalkayguna koore Carbeedka ayay hoostiisa ka soo mutuxantay. Sidaa ayaa jiilaalku[17] wax yeelaa carrigan. Waa xilliga ugu xun ee Afrikada Bari la safro.

---

[14] Dadka degaanku waxay ku magaxaabaan **Jirac**, qiyaas ahaan ¾ inji ayuu midkii dherer la’egyahay, wuxuuna leeyahay qaniinyo sidii qodaxdii wax u mudda aadna u xanfafta muddo daqiiqado ah. – *[B]*

[15] Waa aagga dhulka ’Oogo’ lagu magacaabo. Aagga kale ee ka hooseeya xagga xeebtana ka xiga ’Guban’ ayaa la yiraahdaa. – *[T]*

[16] Geedkani waa waabayda laga baqo ee Soomaalidu sunta waabayda ka soo saarto, tan leebabka la mariyo. – *[B]*

Waa geed madow wareegsan oo aan sidaa uga duwananayn bay [?] Wuxuu ka baxaa kuraha dhinacyadooda, badanaana 20 cagood ka ma dheeraado qararka iyo gebiyada . Waxa uu u baxaa cutubyo qurac madow u eg, marka ay quracda ka ag baxaan. Qodax ma leh caleentuna waxay leedahay qaabka laurel oo aanay lo’du taaban, in abaari ku khasabto mooyaane. Waxa kale oo uu leeyahay ubaxyo qurqurxoon oo basali-cad ah iyo miro la cuni karo oo madow  marka ay bislaadka yihiinna casaada ah. Diirkiisu waa khafiif, laftu waa hurdi cufan oo aad u adag. Xididku waa sidii dhanagsi  *liquorice*  qaabab kala duwan loo diyaariyo, waxa ka soo baxaana waa wax sun midabku madow dugul ah u egyahay. Dalmarro ayaa si aan saxnayn ugu qaatay in sunta leebka ee Bariga Afrika laga soo saaro dhacaanka geedka  *Euphorbium*. – *[B en.]*

[17] Jiilaal waa xilliga engegga ah oo Diseembar ilaa Abriil ku aaddan. Dhulku markaa waxa uu n oqdaa abaar (Carabiga waa Jaxr). Reerguuraagu waxay u guuraan sanaagga hoose  ee daaqqa laga heli karo. Qaar ayaa xilli shanaad ku sheega Kaliil, ama hanfiga u dhaxeeeya Jiilaalka iyo maansuunka. – *[B]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Todobadii saac ee duhurnimo ayaannu geed Daray ah oo isaga iyo togga ku hareeraysanba ugaas Gaallo oo ‘Halimalah’ la yiraahdo loogu magac daray hoostiisa ku furnay. Kayntaan duqowday kala bar oo bar in ka badan ayaa qallashay, dhawr jirridood oo oo geedokaraamayn darteed aan cidi qaadin ah ayaa dhulka leged u daadsan. Jirridda ama jirridaha laamaha leh dushooda waxaa ku xardhan calaamado ay si qoto dheer uga jeexeen duul hore, laanta waynna waaga ay jirtay iyo duqowga ayaa hul dallaallimo ah oo koox rag ah qaadda ka yeelay. Geedkan barakaysani, sida ay Soomaalidu u haysato, wuxuu ahaa meel uu ku cibaadaysato gaalku, karaamadiisii horena wali ka ma ay tegin. Halkan, Ugaaska Gadaabursi oo malaha xusaya fididda qabiiladu xagga galbeed u sii ekaanayso ayaa isaga oo duub cadi madaxa sunniyaha dushooda ugjoogo farasna ku jooga xagga Dooxada Xarawo uga fulay, si uu goobjoog uga ahaado dhoollatus cayaareed oo halkaa ka dhacayay. Maaddaama qof walba oo meeshaa maraa uu booqdo geedka Xaliimaale, burcadda Ciisaha Waqooyi iyo Jibriil Abokor (laf Habar Awal ka tirsan) ayaa joogto ugu kulma, sadcaaluhuna wuxa uu waddada maraa isaga oo baqdin la jarcaynaya. Beeggu wuxuu cabbirayay taag sare oo 3350 cagood ah. Hooska qabow ee geedka hoostiisu waxay cimmiladu i xasuusisay Koofurta Talyaaniga oo xilli dayreed ku jirta. Waxaan arkay butter-cup oo maqlay Geedagaraac (Dhawdhawle) jirridaha hulan gaawinaya. Waxaan xasuus ugu noqday kaymihii furnaa ee Ingiriiska. Abbaanka iyo raggiisii waxay ku adkaysteen in galabta la socdo, laakiin caafimaadkayga waxaa wax u dhimay biyihii xumaa ee xeebta, awrtuna daal ayay la il darnaayeen.

Haddaba, sidaa ayaannu awrtii kirada ahaa ku fasaxnay, alaabadyadiina jabad laga guuray ku daadguraysannay, oo inta dab shidannay si aan habeenkaa si fiican u nasannay. Badwidii oo dhaxan la qarqaraya ololka ayay kulaalid macaan agtiisii u soo yaxoobsadeen si raggii mayalka adkaa ee Iglan weligood aysan waligood dab u kulaalin. Wajiyada ayay iska uugaariyeen, gacmaha halaamacoodsadeen, oo duudadka iska dubeen, iyaga oo si wayn ugu bogaya. Haddana lugaha ayay ololka dhex haadiyeen, si ay si bisqinta oo xilligan si aad ah ugu baxda isaga gamaariyaan. Yawmul Qiyaame oo ka faanaya ayaa shaydaammo ku masleeyay, isaga oo soo qabsaday maahmaahdii carbeed ee ahayd ‘Alle ma barakayn nin sulub ah iyo naag dhogor leh midna!’

Diseembar 8, laba saac oo subaxnimo, ayaannu aayar Togga Xaliimaale oo sagxaddiisa dibirka ah ay quruurux dhagaxmacdaneed iyo dhagaxbaruur ah oo buuraha ka soo hoobtay la bidhbidhayso kor u raacnay. Geedaha dhammaantood qodax ayay leeyihiin, marka Labiga iyo Asclepias laga reebo. Gobtu si ugbaad ah ayay xirar ishaysta ugu baxdaa. Laamaheeda qallallan haweenku waxay u adeegsadaan in ay timaha ku uunsadaan, Qadiga oo geed sidii Qaanaqubta[18] kulligi mudacyo taagtaagan lehina badwidu waxay ka goostaan daababka gudimaha. Waxaa la i tusay Cobol xabag la cuno leh iyo nooc Quraca ka mid ah oo halkan Galool looga yaqaan. Diirkiisu dharka asal guduudan ayuu ku reebaa, qodaxdiisuna waxay bixisaa cambuul marka ay

[18] Kashiito iyo yeedaddo, waa magacyo kale oo loo yaqaan xawayaankan. – *[T]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

curdanka yar ee jilicsan tahay Soomaalidu cunto, marka ay duqoydo se qori sidii jooska u kakan noqota.

Abbaarihii saddex saac oo subaxnimo ayaannu ka gudubnay Cabaso Yar, dix qarar dhaadheer oo dibir adag ah leh, dandaanno waawayn oo dilindillaysina ay ka buuxaan. Inta ka baxnay [toggii] ayaannu kor ula sii meermeernay karin qodax leh oo buuraha sare dhexdooda ah oo kaaniyaallo waawayn ka buuxaan iyo xatabado maxdin ah oo sidii jaranjartii u samaysan. Halkan waxaa ka muuqday dhowr qabri oo Gadaabursi ku aasnaa, taallooyin dhagxaan yaryar oo ood ama xayndaab dhismihiisu iska fududyahay ay ku meegaaranyihiin. Kan dambe [oo xayndaabka ah] looxyo dhagax ah ayaa laga dhisay wax aad mooddo guryaha caruurtu dhisto marka ay ciyaarayso, si loogu muujiyo inta reer ee qofka dhintay uu ka tegay. Qabriga cusub waxaa lagu gartaa gorofyada a dabada dhuuban ee usha qabriga madaxiisa ka taagan sursuran. Geed u dhow meesha waxaa lagu tuuray gogoshii ninka dhintay maydkiisa qurigiisii aakhiro lagu keenay, meel aan sidaa u fogaynna waxaa yaal dhardhaarradii madoobaaday ee axanka lagu karshay. Shan saac oo subaxnimo ayaannu Cabaso Wayn gaarnay. Waa dix balacceedu ilaa 100 yaardi la’egyahay oo ugbaad wanaagsani uu teelteel uga baxo, ugaar Garanuug la yiraahdaana dhoobantahay. Biyashubkeedu wuxuu galbeed iyo koofur-galbeed ugu shubaa bari iyo waqooyi-bari, sida waddankan ay alaaba tahay. Duhurradii ayaannu degnay, markii aannu siddeed mayl ka soo soconnay Geedkii Barakaysnaa [Xaliimaale].

Sagaal saac iyo bar galabnimo markii ay ahayd ayaannu inta rar ku celinay Dooxada Cabasood hore u sii raacnay. Waa meeshii ugu bilicda samayd carriga ee aannu ilaa iyo hadda aragnay. Si ay ahaataba, in dad carriga joogo waxaa ka markhaati kacay laamo laga jaray dhir qodax leh oo sagxadda togga xannibay. Waxa kale oo aannu garannay raadadka libaaxyo ugaarsato ku joogto iyo xarriiqaha is daba jooga ah ee xamaaratada oo mararka qaarkood ballaca shan inji dhexroorku gaaro. Fiidkii markii loo dhowaa ayay kooxdayadii baqdin is duuduubeen, iyaga oo ismoodsiiyay inay warmo geedaha dhexdooda galac leh arkeen. Dareenkoodii waan iska dhayalsaday, subaxii dambe se waxa uu ka wareegay in ay dhabta u dhowayd toodu. Qorrax soo bixii ayaannu la kulannay xoolajire dhagaxa noogu dhaartay[19] in uu caano uu tubaako naga siisto noo keenayo. Markanna, haddii aannu shan mayl soo soconaynnay, waxaannu ku hakannay jabad cidla’ ah oo dixda qarkeeda bidix ku yiil. Daruuro ayaa kuraha dushooda sagal madow isugu gedaamay, gufaaco xoogan oo roob maagganinna waxay digniin nagu siisay in aannaan la daahin dhismaga guriga. Dab wayn ayaa la beleliyay, dhowr xabbadood oo libaaxyada carrigan buuxa lagu didiyana waa la riday. Laba goor ayaa intii habeenka lagu jiray ay awrtayadii didday oo ooddii xerada dhexdeeda carar wareegaalaysatay.

[19] Dhaartani waxay u egtahay dhagaxyacaabudka Carabta ee laga keenay Xabashida iyo Gaalladii reer Saba. Badwida Ciisaha iyo Gadaabursigu waaba ay kaga sii kalsoonyihiin dhaarta diiniga ah ee la wada yaqaan. Marka qof la tuhunsanyahay uu dambiga inkiro, qaalligu inta hortiisa dhagax dhigo ayuu leeyahay ”Taabo!” Waa dhif in uu beenlowgu ku dhaco taabashadiisa. Mararka qaarkood Soomaaligu dhagax buu kor u qaadaa oo yiraahdaa ”waa iga Dhagaxa”, guud ahaan in la rumaysto ayaa dhacda. – *[B]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Diseembar 9, subax sabti ah ayaan goor dambe dhaqaaqay, aniga oo ay i weheliyaan Riiraash iyo Yawmul Qiyaame, si aan u booqdo burburro ka durugsan jidka tooska ah. Saacad markii aannu sii fuushanayn ayaannu Dooxada Cabbaso ka leexannay oo galnay godeen buuraha dhexdooda ah oo 16 mayl qiyaastii u jira Geedka Barakaysan [Xalimaale]. Halkani waa meesha ay ku taallo Darbiya Qoola [Qalcaddii Qoola] oo lagu magacaabay boqorad Gaalla ahayd. Waxaa la sheegaa in magaaladan iyo tan deriskeeda ah ee Aw Buuba ay sidii bisadihii Kilkenny[20] u dagaallameen, ilaa labadoodiiba 'riiqmeen'. Gadaabursigu waxay dhacdadaa ku qiyaaseen waagii abuullankood ay weli xeebta Buulaxaar degganaayeen, qiyaastii 300 oo sano ka hor. Haddii taariikhdaasi saxantahay, burburrada baaxadda lehi hardan badan ayay waayaha la galeen. Guryo burburkood ayaa dhulka filiqsan, ceelal si wanaagsan loo dhisayna qashin ayaa buuxiyay. Qasrigii oo derbiyadiisu ka samaysanyihiin dhagax iyo dhoobo qoryo ku dhafanyihiin ah ayaa la ii tilmaamamy. Masjidku waa guri wayn oo aan saqaf lahay oo 12 tiir oo afargeesyo farsamo silloon ahi hayaan, Mixraabkana waxaa muujinaya aargo xoodan oo dhismaheedu iska roonyahay. Hase ahaatee, codkii Mu'addinku waligiba waa juuq gabay, haddana geedsaar ayaa isku marmaray masjidka burburay. Muuqaalka meeshu waliba sidii qabriga ayuu u liitay. Dhul dhererku mayl iyo bar jeedo ayaa dhammaan burbur halkan ah, burbur xaggoo ah iyo burbur kale uun ahaa meel walba.

Magaaladan dhimatay haddaanu ka tagnay, xagga koofur-galbeed ayaanu uga fuulnay karin laba buurood oo adadag dhexdood ka baxa oo tan ugu bilicda san Wanauli [?] lagu magacaabo. Sida caadi ahaanba ay qodax miiran u yihiin, geedka dheer ee 'Waadhiga' wuxuu bixiyaa xabag loo adeegsado maryo aslidda, caleemaha Wumbaha [Qumbaha?] ee ugbaadka ahna waxaa laga helaa waxa dermaha ugu wanaagsan laga sameeyo, [Cawda ka sokow]. Dhulka waxaa ka muuqdey ubaxa buluugga ah ee 'Manka' ama 'Himbah [?]' Waa geedgaab bataati u eg oo bixiyaa miro tufaax midab baxsan leh ah oo iniino midab bunni ah oo aanay Soomaalidu cunin leh. Weheliyeyaashadu waxay i dhadhansiiyeen xoogaa miraha Karir-ka [?]ee midab iyo dhadhanba canabka cas uga eg, caleemaha waxaa loo adeegsadaa dhayidda boogaha.

Dusha haddaanu gebi kor ugu baxnay, xoogaa ayaan is dul taagnay si aan muuqaalka foolkayaga ah u indha'indhaynno. Hoostayada waxaa goglanaa bannaan sanaag dheer oo caws ah. Maxay baqalahayagu muuqaalkaa ku farxi lahaayeen! Markii iigu horreysay Afrika, fardo ayaa ii muuqday si xor ah duurka u daaqaya. Meel xoogaa yara durugsan waxaa dhaca togga Aylonda [?] oo qabuuro la buurbuuran dhirna la madow. Shishadiisa waxa waran Togga Harawo, godeen dheer oo ilikuwareerdhay jaaha guud buuxiya. Musduleedku wuxuu ahaa siman kuro bulug ah leh. Waa aagga labaad ee Harar loo maro, figteeda sarena waxaa ishu qabato galbeed soo xeeray xarriiq dahabi ah oo Bancawseedkii Marar ah. Durba waxaan bilaabay in aan dareemo yoolkii safarkayga.

[20] Carri Ireland ku yaal. – *[T]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Duhurradii markay ahayd oo aannu xero ay subaxii Abbaanadanadii Gadaabursi xoolayawgoodii ka soofsheen gaarnay ayaannu geed hoostii fariisannay, imanshahayagiina bastoolad kaga baaqnay. Muggan duqaydii ayaa soo baxay oo saaxiibkoodii hore, Yawmul Qiyaame, marti sharaf ahaan u soo dhoweeyay. Wuxuu aad uga waraystay muranka la sheegay in uu u dhaxeeyo Abbaannada iyo seeddigood Garaad Aadan. Markii uu hubsaday in ay kutirikuteen Soomaaliyeed tahay ayuu madaxa gilgilay oo si xarrago leh u yiri, “Wixii Aadane naga xiro Allaa fura!” Waxaan isku bogaadinnay ka runsheegidda ulajeeddooyinkayaga, waa qodob Muslimiinta dhexdooda guul lagu gaaro e. Dabadeedna annaga oo suuragalka hoosaasin kale aan moogayn ayaannu nin faras ku jooga u dirnay Abbaannadii. Haddana rag hubaysan ayaa inta noo soo baxay na wayddiiyay in aannu nahay Safarkii awrtu u rarnayd ee xalay togga kor u soo hayay. Markii aannu haa ku jawaabnay ayay iyaga oo qosol ku jawaabaya qireen in col laba iyo toban nin oo fardooley ahi nagu la raad joogeen weerar kaftan ah. Sidani waa isboorti badawidu ka helaan, marka socdaalahu baqdin muujiyana waa looga dhabeeyaa. Mar ayaa saffarray ganacsato Carbeed ah oo aan garanayn ‘waxa maddooda’ laba Soomaali ah toogteen. Qabiiladu garsoor waxay ku gaareen in aan martida dambi la saarin. Si kasta ba ha ahaatee, waa ay ganaaxeen oo dhawr yaardi oo maryo ah ayaa reeririhii laga dhintay la siiyay. Si aan aabigaa ugu jawaabo ayaan bastoolad iyaga oo aanay martigeliyeyaashaydii cusbaa iska jirin madaxyadooda ka dul riday, sidaana ku af jaray argagaxintoodii caatada ahayd, aniga oo doonaya in aan kaftankooda dhabta ah ee mustaqbalka dhiciseeyo.

Geed hooskii ayaannu maalintaa ku idlaysannay. Awrtii oo labadaydii cagayare ay soo hoggaansheen haweenkii oo ay qiyaastii siddeed saacadood ku qaadatay in ay masaafada soo jaraanna ilaa qorrax dhacii la gaaray ma iman. Baqdin aannu libaax ka qabno ayaannu xeradii dhexdeeda degnay;carruurta ooyaysa, marwooyinka wax canaananaya, xoolaha gurdamaya, eyda ciyaysa, dakhsi, shilin, qurun iyo cariiriba ha iska ahaatee. Hadda ayaan isku deyi doonaa in aan bal qeexo sida degmo u egtahay Bariga Afrika.

Reero ama degmo waa saf aqallo firirsan bannaannada qodaxdu ku yartahay, subaacu dhif yahay, colalna aan laga filayn. Xagga buuraha waxaa ku wareegsan xero adag, si aysan xooluhu u baxsan. Marka baqdin la qabo waa la laba’oodaa oo la saddex oodaa. Sidaa oo ay tahay, libaaxu mararka qaarkood wuu u dhacaa, haramacadkuna isaga oo neefka afka ku sita ayuu hal booddo kaga baxaa. Xeradu badanaa waxay leedahay afar illin oo habeenkii oodafooyin isa saaran lagu qooyo. Gudaha xayndaabyo cilimmo ah ayaa lagu kala qoqobaa xerooyin kale oo xoolaha noocyadooda kala duwan lagu xareeyo. Mararka qaarkood waxaa jira xero gooni ah oo xayndaabka kore ku qabsan oo geela loo qoondeeyay, badanaana bartamaha xerawaynta ayaa lagu xareeyaa. Fardaha oo meesiga ugu qiimaha badan ah iyaga gooni ayaa loo soocaa, ninka leh aqalkiisa ayaana lagu ag dabraa, hooso yar oo nagaar iyo qoryo ka dhisanna ruqada meesiyada ayaa kulaylka milicda iyo dhaxanta habeenkii lagaga gabbaadiyaa.

Guryaha gembisyada ah si haldhaaf ah ayaa xayndaadka shishe dhexdiisa looga dhisaa, aqallo nusgoobo ah oo buul shinniyeed duqoobay u eg, qiyaastana shan cagood


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

oo dherer ah, lix injoi oo dhexroor ah iyo 12 inji oo balac ah la'eg. Degaannada kulul waaba ka sii yaryaryihiin intaa, laakiin ballacoodu waa kordhaa marka oogada sare ay cimiladu mid aan wanaagsanayn ka dhigto. Waxa uu ka samaysanyahay waa qalfoof 'dhigo' ama ulo la goday oo dab lagu adkeeyay ah. Si aqalka loo dhiso, kuwaa ayaa dhulka laga mudaa oo xargo la isku la qabtaa, dabadeedna raar laba nooc ah ayaa la huwiyaa. Cawsku wuxuuuu ka koobanyahay xidhmooyin yaryar oo si wanaagsan loo xiriiriyay, waa adagyahay xanafna ma leh. Kebeddu waxay leedahay gan dhaadheer, waxaana loo adeegsadaa dangiigsi iyo waliba ded sare. Halka iridda ah ee hore waxaa gala mid ka mid agabkaas oo sidii daaha noqda. Xilliyada dabayluhu dhacayaan saamo ayaa dhalada aqalka lagu fidiyaa, mararka qaarkoodna ciid ayaa bannaanka la tuuraa si ay roobka iyo dabaysha u moosto. Maacuuntu sida aqalka ayay iska fududdahay. Saddex dhardhaar iyo god waa jikadii oo carruurta, waxaraha iyo nayluhu ay ag seexdaan. Maaddaama aanay shawladda qiiqa saartaa jirin, gudaha aqalku qaac ayuu la madoobaadaa. Waylaalisaha maalintii meel sare ayaa la suraa, sidaa oo kale hubka iyo agabka kale ee jiirka iyo aboorku wax u dhimaan dhagaatiyo iyo xargo ayaa barbar lala suraa. Sharraxaadda ugu mudani waa xeerooyin kuulo, aleelo iyo suuman asal ilqabad leh lagu mardaaddiyay. Agabka dhoobka ah maddaama aan halkan laga aqoon, Badwidu xididka saafkiisa ayay qaabab kala duwan u tolaan oo shay biyo celiya ka dhigaan, inta asalka diirka geed kale oo la tumay mariyaan. Haantu waa weel waynoo qabo ka samaysan oo inta saab la gesho socdaallada biyaha loogu saato. Gorofku (eray 'ghurfah'da Carabiga laga keenay) waa weel daba dhuuban oo loo adeegsado in ceelka biyaha lagaga soo dhuro. Dhiisha caanuhu waxay u samaysantahay sidii laba hdhuub oo dhexda ay isaga hayaan suuman dhinacyada ka baxa, kan kore ee yar ayaa haruub iyo koobba u taagan. Ugu dambaynna Weesada, ama ubbada, waxaa lagu shubtaa sahayda biyood iyo weesada sadcaalaha. Marka xerada laga guurayo aqalka iyo agabka waxaa lagu raraa awrta, oodda iyo digadana mararka qaarkood dab ayaa la qabadsiiyaa, si meesha loo nadiifiyo oo qaniinta looga dilo, cadowgana loo dago. Dhulka oo dhan xirmooyin goobaaban oo wada hiil madow ama ood qodax leh oo deegaamayn xooggan muujinaya ayaa buuraha dhinacyadooda dhafan. Socotadu mar walba jabad laga guuray ayay daydaan, nabadgelyadooda awgeed. Diidmo isdabajoog ah ayaan ka keenay doorashada meelahaa oo kale, maxaa yeelay habeenkiina waa cayayaan badanyihiin, maalintiina waa goobo dakhsi xoonsanyahay. Tan keli ah ee la iga yeelay waxay ahayd in xero cusub xayndaabka xeryaha xolaad ee dadka badani deggenyahay lagu qabto.

Diseembar 10 ayaannu hakannay: biyaha wiyeerka ah, qorraxda duhur ee heerkulka 107° gaarayso iyo dhaxan subaxeedda 51° isku celceliskeedu yahay ayaa si daran caafimaadkayga wax ugu dhimay. Dadwaynihii oo dhan ayaa isu soo baxay, iyaga oo aqalkii taaloogyo liicliicaya iyo wajiyo dhaygagsan ku madoobeeyay, si ay ii arkaan. Gadaabursiga oo ardaallo edboon ahi waa ay ka cudurdaarteen soo gellidda oodataraarka ah. Rag, dumar iyo carruur waa soo dhoobteen, iyaga oo caano, subag iyo hilib sida. Dhawr duqayda ka mid ah ayaa xusuustay in ay igu arkeen Berbera[21],

[21] Sannado ka hor ayaa ay haweeneey Faransiis ahi Berbera ka soo degtay. Wajigeedii caddaa ayaa nin walba xaaskiisii nacsiiyay, haweeneey walbana nafteeda nacsiiyay, sida Yawmul Qiyaame sheegay. Ma garanayo tan


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

gashaantiyo indho nuxuus ah leh oo aan xishood ku jirinna waxay ku adkaysteen bal in ay martiga cad daddammoodaan. Markii aannu nasiino kifaaxnay ayaan maalintii dambe ku dhaqaaqay ‘aniga oo xashaashaya’si aan u soo indha'indheeyo burburrada Aw Buuba. Markii aannu dhul dhagax ah muddo sii fuushannayn ayaanuu dhul caws leh oo teedka buuraha ah ka hoseeya soo galnay, dabadeedna waa degennay, si aannu u booqanno burburkii Sheekh Aw Buube. Wuxa uu ku aasanyahay dahar yar dhalo dhuuban oo jaajuur, dhoobo, iyo qoryo dhismahii Saylac u eg ah. Qurub qurub ayuu u sii kala daadanayaa [daharku], masjidka ku qabsan oo wax badan saqaf la’aanna dhir jabaq khushuucsan neecayda fudud ee macaan la jagagac leh ayaa ku baxday. Haddii ay albaab cilin ah ama ba dalool xaluusheen, hageyaashaydii Gadabuursi waxa ay ii tuseen wax ka dhalaalaya dhigta aargada iridda isheeda. Sida ay u ifayso daraadeed, qalin ayay u maleeyeen, Yawmul Qiyaamena halkaa qorshe xabaalo qufasho ah ayuu ku faqay, si loo bililiqaysto waxaa ifaya. Makhsinka dhexdiisa oo saddex qabri oo faaruq u saansaan ekaa ayaa ku yiil, sagxadda godan ee mugdiga ahna dhawr dhagaxyo gamgamuuxan ah oo kubbado kanooni la moodo oo Soomaalida reer magaalaha ahi ay dhagax miisaan u adeegsato ayaa daadsan. Dabadeed didib dhaqaxciideed ballaaran oo goobtii dagaalka ah, sida ka muuqatana qoobkii baqlaha iyo farduhu fadallo ka bixiyeen  ayaannu u sii dhaqaaqnay. Halkan oo hageyaashayadu ii sheegeen in ay waagii hore dhul jilicsan oo wax ka baxaan ahayd waxaa ka dhacay dirirtii waynayd ee Aw Buube iyo Darbiya Qoola. Masjid kale oo darbiyadiisu aanay sidaa u sii burbursanayn se isaguna sida meesha oo dhan saqaf la’ ayaa laga helay. Guuleed Dheere ayaa inta jaranjaro jaban minnaaradda afargees ah ugu baxay ku dhuftay aadaan badoweed kii ugu jaahilsanaa. Qalfoofyadii guryaha haddii aanu dhaafnay, shaqadayadii subaxaa waxaannu ku gebagebaynnay booqasho aanu ku tagnay qabuuraha waawayn. Sida ka muuqata lafo Muslin ku ma aasna meesha: waa safaf dhaadheer oo dhagxyo galbeed u jeedda ah, [qabuuruha] midkoodna waxaa ku lixaamadan sibir adag oo qarkiisa si qurux leh loodhoobay ay saaxiibbadayda jaahillada ahi qoraal mucjiso ah ka heleen [kajan]. Waxaan maqlay magaalo kale oo Cammuud la yiraahdo oo buuraha ku dhow ku taal, ma se booqan iyada. Meelahaa dhammaantood waa degaanno Gaalla ka haray oo sida jaahilnimada iyo buunbuuninta Soomaalidu sheegayso ‘qoraallo’ iyo dhismeyaal waawayn la ciiraya.

Markii aannu gurigii ku soo noqonnay, waxaan u nimi badawiyayadii Gadabuursi oo si wacan u yeeriddayadii u soo ajiibay. Lixdii wiil ee ugaaskii la yiqiin ee Cali Cadde ee saddexda bahood kala ahaa; waa Buux, Cige, Khayrre, Nuur, Ismaaciil, iyo Yoonis e, ayaa dhammaantood markii aan faraskii ka degay ii soo baxay oo gacan saaxiibtinnimo igu salaamay, guryahoodiina igu soo dhoweeyay. Marka laga reebo kan ugu horreeya oo nin xooggan oo ugu yaraan afartanjir ah, walaaluhu waxay ahaayeen dhallinyaro qurqurxoon oo midab maarriin furan ah leh, qaabdhismeed isu dheellitiran iyo lixaad wanaagsanna ka muuqdo. Gurigayga ayay soo galeen markii loo amray, se in ay wax cunaan waa ay diideen, iyaga oo ku cudurdaartay in ay meesha soodhowayn uun u yimaadeen ee ayan cunno doonayn. Warqaddii Xaaji Sharma’arke ee isbarridda

ay haweeneeydu ahayd, laakiin wajigeeda soo jiidashada lehö iyo diraceeda xariirta madoow ah ayaa xusuus dheer ku reebay qalbiga Soomaalida. Xeebta ilaa Harar wali si wayn ayaa looga xusuustaa. – *[B]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

ahayd ayaa kor loogu akhriyay, iyaga oo aad ugu faraxsan, codsigooda dartina mar labaad iyo saddexaadba akhris loogu naqay. Dabadeed, markii aan labadii Abbaan, Raage iyo Riiraash, xig hadiyado ah ku fasaxay ayaan warqad ammaan ah ka qoray oo Xaajigii u sii dhiibay, aniga oo ku ammaaneeyay dad safar Saylac u socda la noqonayay, ka dib markii ay badeeco dhulka gudaha ah geeyeen. Intii ayan tegin, casuumad tabtii waagii Homer u qalanta ayaa meesha ka dhacday. Wan ayaa la qowracay, uurkujirtii ayaa laga saaray, oo inta mid digsiyadannadii waawaynaa ka mid ah lagu tuuray muddo saacad ah looga leefay. Hilibkii naftu ka qoyannayd waxaa lagu dejiyay cantuugooyin waawayn oo caano ah. Dadkii casuumadda cunay sidii dadkii Wadsworth ee ‘midkiiba afartan cirkood lahaa’ ayay u ekaadeen. Bidixda inta hilibka ku qabsadaan oo ilkaha surtaan ayay toorrey dheer oo si daran afka ugu dhaw ugu cadgoosantaan, se samankoodu waa dhaadheeryihiin afafkooduna hore u ma soo taagna. Intii la cuntaynayay dakhsi ayaan meesha uga cararay oo geed aan jeclaa ka fuulay. Halakan, markii Yawmul Qiyaame arkay in aan weli xanuunsanyo ayuu wuxuu ku adkaystay in aan dawo Soomaali isku dayo. Laba qori oo qallallan ayuu soo jabsaday, koodii gaabnaa ayuu dhexda ka faray, kii dheeraana waa uu qoray, labadii ayuu isku taagay inta xoogaa ciid ah ku firdhiyay. Dabadeed, ‘qorigii dheddig’[22] ayuu cagta saaray, kii kalana calaacalaha ayuu ku xurbiyay, ilaa qaac iyo gamaar ay keeneen. Dabadeed caloosha ayuu lix meelood si qumman iiga gubay, isaga oo xiganaya caadada ‘Dab iyo Cudur meel ma wada galaan.’

Talaadadii, Diseembar 12, ayaan si dirqi ah labadii wiil ee ilma Cali Cadde oo isu xilsaaray in ay dhulmariyeyaashayadii noqdaan ugu amray in ay fardahooda kooraystaan. Cabsi ayay u qabeen gammaanka qaaliga ah, xilli cawsku dhif qallallan yahay. Himmijab ayaa igu dhacay markii aan arkay waxa ‘Faraska’ Soomaalidu ku faanto yahay. Waa geenyo yar oo 13 gacmood dirqi ku la’eg. Madaxu waa qurxoonyahay, indhuhu si fiican ayay u qayaxanyihiin, dheguhu waa yaryaryihiin, qaabkooduna waa wanaagsanyay, ha se yeeshee dirkii Carbeed waa ku hagaasay cimiladan. Waa nugulyihiin, qabowyihiin, sida meesiyada kale ee adduunka dhankiisaan jooganana waa hebed. Dhagaxyo jibaaxidda ayaa gommado sugan u yeeshay, markii daal lagu dirqiyana dhiig ayaa ku soo joogjoogsada (raaf dillaac).

Waa dhif in ay Gadabursigu iibiyaan fardahaa oo ay feejignaan ahaan ugu haystaan qabiilooyinnka ay deriska yihiin ee Ciise iyo Geri oo dhammaantood lugkudirir ah. Degmo ayaa laga helaa in ka badan lix ama siddeed, qiimaha ugu hoseeya ee lagu iibiyaana waa 10 neef oo lo’ ah ama 20 go’. Badwiga Soomaaliga ahi daabbaddiisa waa u dhimriyaa marka uusan ku joogin, markii uu kooraystose u ma aabayeelo oo waa ku adkeeyaa. Wixii neefku markuu yaraa uu qurux lahaaba waxay lumaan inta uusan shan jirsan, in yar mooyee inta kalena anqowbarar iyo dhabarwareeg ayaa ku dhaca. Meelo carrigan ka mid ‘in aad laba ama saddex goor karaar xooggan ugu soo dirgato gurigaaga inta aadan ugu dambaynta ka degin aad ayaa loogu bogaa, marka la baxayana dabbaaldeggaas ayaa la sameeyaa. Fardafuulka Soomaaliga ahi inta kooraha

[22] Qoriga dheddig waa kan godka kan kale lagu xurbiyo leh. Madag (madko = wadar) ayaa la yiraahdaa, waana qaab dabiici ah oo dabka lagu hursado, hadii aadan dab aad ku qabsato iyo kabriid midna helayn. Isliska labada qori iyo ciidda ayaa waxaa ka dhasha kul dab huriya. *[T]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

ku boodo (haddii aanu leeddafuulayn) isaga oo warankiisa cuskanaya ayuu marka hore isku dayaa in uu faraskiisa gaajaysan cariyo, isaga oo ku dhiirrigeliya dhowr rogaalcelis. Dabadeed inta cirbo darandoorri ah feeraha kala dhaco mararka qaarkoodna katiga warankiisa qutays ka dhigto ayuu ka jeefagaa. Wareeg yar dabadi, isaga oo markaa ku dedaalaya in uu sida ugu wacan isu taago, ayuu meeshii uu ka bilaabay xawaare sare kula soo laabtaa, markaana muquus[23] Carbeedka ayuu si argagax leh ugu jageeyaa faraska duulaya, taas oo faraska daanka qaar jebisa afkana uu dhiig uga buuxsamo. Dhaqaalaynta Carabka la hubaa  uu faraskiisa u hayo aad baa loo yaqaan, arxandarrada Soomaaligu kiisa u hayana waxay ila tahay in iyadana sidaa oo kale loo aqonsado.

Badwidu fardaha way ku tartamaan, si xaraarad lehna waa ugu sharadtamaan. Mararka aanay hawli jirin, beretan dhaqamaeed ay iyaga iyo fardahoodaba ku soo bandhigaan ayaa la qabtaa. Gadabuursiga iyo dhab ahaan Soomaalida oo dhammiba si debacsan ayay fardahooda isaga dhakooliyaan. Koorahoodu waa qaarre kor u kacsan oo saab loox ah leh, sida kan fallaaxda Masaarida. Laba loox oo fudfudud ayaa mid kale oo dhexyaal  dhabarka ku dhereran ah boos qumman u yeela, dabadeedna saddexdaba waxaa si adag la iskula qabtaa dhagaatiyo qoyan. Salsaar harag idaad ah ayaa si debacsan loogu dul fidiyaa, rakaabka cilinka ahna suulka cagta uun ayaa geli kara, maadaama dadku ka baqaan rakaab haddii farasku kufo lugta murgin kara. Muquustoodu aad ayay u naxariis daranyihiin, waana qoolaab bir mutuxan ah oo sida xakamaha Carabta daanka hoose ku naban una gala meeshii silsiladda cansaarta. Shakaallada  Berbera lagu farsameeyo qarkood si qurux badan ayaa maqaar iyo sharraxaad bir dhalaalaysa ah looga sameeyaa, sidii birqoolaabyo quoits[24] yar yar ah. Jeedalku waa daab harag adag oo naxaas lagu maray ah, hal fayraq oo shaabuug gaaban oo ballaaran ahina ka lusho.

Diseembar 12, laba saac oo subaxnimo, ayaannu aniga oo ay i weheliyaan labadii wiil ee ilma Cali Cadde ahaa iyo Yawmul Qiyaame hore uga sii fuulnay, inta awrtii daashay kaga tegey weheliyeyaashaydii iyo dumarkii.  Banka ayaannu jiho koofur-galbeed ah u sii qaadnay, hoobadyo iyo taagag dabadoodna waxaannu nimi qar dheer oo ilikuwareedhay muuqato. Gadaal waxaa dhaca Kuraha Wanauli oo durbaba meel dheer basaligoodu ka muuqdo.  Dhankayaga bidix waa ku yaalla fiiqaq buuro tiro badan oo mid walbaa magaceeda leedahay. Waxaa la sheegaa in aan cidina fuuli karin, taa oo malaha looga jeedo in koriddooda daal laga muto. Halkan waxaa ku yaal meelo lagu siyaarto saddex awliyo ah oo aad looga dambeeyo, Cammuud, Saw iyo Sheykh Sharlaganaadi. Xagga waqooyi-galbeed waxaa la iga tusay buuro lafcir u eg oo Ciisaha Soomaaliyeed dego. Xagga foolka ah oo ay kuraha madow ee Harar ku gadaamanyihiin waxaa dhaca Togga Harawo. Ballaceedu waa ilaa 15 mayl, wuxuuna u kala socdaa ka jeedka koofur-galbeed ku jeedda waqooyi-bari oo sii kala dhex maraa buuralayda Geri iyo daaladhaca dhulka Somaalida Gadabursi, ilaa carriga Dankali [Cafar], sida la sheegay. Waagii hore dhulkan ugbaadka aan la degganayn ah waxaa

[23] Muquus waa liijaanka/xakamaha faraska qaybta birta ah ee afka loo gesho. *[T]*

[24] Bir qoolaaban oo nooc isboorti dhaqameed Yurub lagu ciyaaro. Qoolaabta ayaa meel xoogaa yool dhulka suran u jidha laga soo tuuraa, iyada oo lala beegsanayo kurtun dhulka mudan oo la doonayo in lagu qoolo. *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

lahaa qabiilada hore [Geri], laba iyo toban sano ka hor ayaa se waxaa ka qaaday Gadabuursi oo isla markaana ka dhacay 30 lo' ah, 40 geel ah, iyo in u dhaxaysa 300 ilaa 400 oo ido iyo riyo ah [ari]. Xoolo fara badan oo rag warmo leh duurka daajinayaan ayaa na garansiiyay in aan ku soo dhowaannay degmadii ay wiilashii Cali Cadde degganaayeen.

Afar saac iyo bar subaxnimo, markii aannu siddeed mayl soo fuushanayn, ayaannu gaarnay halka uu dhaco degaandegga hoose ee Kuraha Waqooyi ee Dooxada Harawo ku xeeran. Waylaalisahayagii ayaannu geed hoosti la kala baxnay, isla markiina waxaa na hareereeyay badwiyiin keenay caano, hilib solay lo'aad ah, subag iyo malab ku jira mid ka mid ah xeerooyinka aslan ee Cutch laga keeno. Quraacdii oo Yawmul Qiyaame uu hilibkiisii oo uu malab ku dhuuqay dadka kaga duwanaa ka dib ayaannu inta buntukh qaadannay kaynta qabannay. Waxay la ciirciiraysay sagaaro iyo Geranuug, dudumo walbana kadabshiir ayaa fara kulul ku hayay, guuguule iyo digiiran ayaa iyaguna xirarka dhex mushaaxaya, geedaha dhexdoodana waxa aannu ka maqalaynay cida joogtada ee Goobiyaanka iyo shimbirta cideeda kaftanka loogu magacaabo ' Doobow-doqon-gus wayn', iyo galayrka midabka ifaya leh, iyo Aboodiga ama Bikiyah cirka aan daruurta lahayn hawada sare baalka simaysa. Ugaarsi markii aannu ka daalnay ayaannu waylaalisahayagii ku soo laabannay oo badwidii sheeko la fariisannay. Waxay ku faaneen xeesha ay gaashaanka u adeegsadaan iyaga oo u muuqday kuwo aanay waafinnimada warnduugga micnihiisu dhacsananayn. Si aan fikrad wanaagsan uga siiyo ayaan koodii ugu wanaagsanaa ul u dhiibaay, aniguna mid ayaan qaatay oo isu dhiibay in uu ila helo. Markii uu si isdabajoog ah ii la waayay ayay dhangad kululi halka jirkiisu ugu jilicsanyahay ka qabsatay. Dudkii daawanayay ayaa qosol dheer oo cod sare ah ka wareegay, iska yeelyeelkii 'geesi gaashaaman'-nna halkaa ayuu wareer ku dambeeyay.

Gabbalkii ayaa dhacay, wax safar ahi se ma soo muuqan. Waxaa daahiyay baqal baxsaday, malaha rabidda xakamaynta dibjirnimadayda darteed ayuusan ilaa habeenbarkii iman. Martigeliyeyaashadii guri ayay soodhawayntayada u banneeyeen, caano noo keeneen, martigelintoodiina heerka ugu sarreeya oo ilaa talaxtag ah fidiyeen.

Rejo aan ka qabay in aan sadcaalo durbaba waaberiga subaxa Diseembar 13 tahay ayaan Buux iyo walaalihi aqalka ugu yeertay oo xasuusiyay in Xaajigu ballan qaaday dalmariye aan daah lahayn oo i gaarsiiya ilaa degmadii Garaad Aadan. Waxay iigu jawaabeen, in kasta oo ay aad u jeclaan lahaayeen in ay ballanta fuiliyaan, se imaanshaha Madaxu, wiilkii ugu waynaa, uu wadatashi ku baaqay. Dabadeed, inta geedaha galeen ayay shir u fariisteen laba saac oo subaxnimo ilaa duhur dabadi. Ugu dambayn xal aan la dhaafi karin ayay gaareen. Nimanku midkood ayaysan carriga Garaadka u aammini karin. Ha se ahaatee, nin faras ku joogaa waa in uu u qaadaa garaadka Geri warqad in uu seeddiyaashii soo booqdo ku casumaysa. Waxaa la iigu laabqaboojiyay in garaad Aadan isaga oo aan biyo kabban uu soo koraysanayo si uu noo la kulmo, se, cabsidu labada dhanba waa ay ka jirtay oo waxaa iska caddayd in


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

aano dhex tiil, aqoon aan caadada Soomaalida u lahaana waxay shaki iga gelisay sida safarkayagu ku dambaynayo.

Si ay ahaataba, warqad ayaa loo qoray Garaadkii xusuusinaysa wixii ‘geedka hoostiisa looga hadlay’ oo ay weheliso hanjabaad ah in isu qoonsanayo ceelka biyaha dhanaan leh ee lo’diisu kaltanka ugu soo aroorto haddii uu ka maago arrinka. Dabadeed waxaa yimi gorgortankii shaqo wacan iyo mushahar. Gorgortan badan ka dib, gaar ahaan dhanka qurunle Cige, waxay yeeleen in ay qaataan 20 go', 3 xirmo oo tubaako ah iyo 14 baac oo maro suuf buluug ah. Intaa waxaan laaluush ahaan u raaciyay mid ka mid ahaa shaatiyaydii Xabashiga quruxda badnaa ee farqaha xariirta ah lahaaye Cadan lagu sameeyay in aan siiyo Buux maalinta aannu degmada Garaadka galno.

Waaberi hore ayaan subaxii xigay u toosay ballanqaad adag oo aan Abbaanka kaga haystay ugaarsi mug leh Dooxada Harawo dhexdeeda. Soomaalidii mar hore ayay sii qaybsadeen raqda maroodiga aan dili doono, baalka geesinnimadana sheegashadiisa waa qoondaysteen horta, anigana waxaa la ii qorsheeyay saddex meelood oo laba foolmaroodiga laga guri doono. Haddaa wax haray oo aan shabbaaxid ahayni ma jirin. Huumbaallayn iyo salaado tukasho badan oo lagu daahay ka dib, Buux faraskiisii ayuu kooraystay, Xammaali mid ayuu iska dhakooliyay, badwi geesi ah oo Faahiye [ama Faax] la yiraahdaana mid kale ayuu ku booday, waxaana aan u dhaqaaqnay in aan raxamaha haleelno. Yawmul Qiyaame gadaal ayuu isu dhigay isagu, walwalka uu ka qabay in baqal uusan maroodi ka dheerayn karin ayaa calool xumo aan afka la soo marin karin ku haysay, ilaa aan markii dambe degmadii ku celiayay. ‘ Fulay in aan ahay miyaad ii qabtaa Xaaji?’ ayuu ku tiraabay wadaadku, inta geesinnomo iska doonay. ‘Runtii sidaa ayaan kuu qabaa!’ ayay ahayd aniga jawaabtaydu. Isaga oo aan waxba yaxyaxin ayuu inta baqalkiisii ciribiyay dhabarka jeediyay, isaga oo leh ‘Aadane soo naf qura uun ma leh? Kii ku khamaaraana soo doqon uun maaha?’

Dabadeed hore ayaannu ugu dhaqaaqnay inta banaatiikhda cabbaysannay, iyada oo Buux sidii khadiibkii hees maroodi qaadayo[25]. Dhulka Soomaaliyeed, sida Kaafirta oo kale, dilka maroodiga waxaa loo haystaa fal geesinnimo, marka laga reebo nin ama wiil la wanjalo. Qabiillada badankoodu waxay ka xirtaan baalka tuurka la surto iyo sindiyad foolkiisa laga sameeyo[26]. Ugaaratada qaarkood, sida Bushmenka Cape-ka[27], qarawaynaha kaynta waxay ku laayaan gamuun gano leh oo sunta Waabaayada la marshay. Qaabka guud ee loo ugaarsado waxay u egtahay tan Agagerta Xabashida ee Bruce[28] qeexay. Nin ayaa faras cad fuulaya oo maroodiga hor afarqaadlaynaya, si uu u cariyo. Maadaama aan hubka qarxa laga aqoon carrigan, hawshu waa ‘cari oo cayri.’ Ninka faraska ku joogaa wuxuu isku beegaa meel jiq ah ama u dhow oo saaxiibki ku sii gabbanaa, kan gabbanayana marka xayawaanku xawlli ku soo dhaafo ayuu gaallays

[25] Maansahawleed ugaarsiga loo adeegsado oo u gooni ah. Maanyo (maanyood) ayaa guud ahaan loo yaqaan. Waxa dhici karta in ugaarsiga maroodigu hees u gaar ah lahaa, la ma se hubo. – *[T]*
[26] Baal goroyo madaxa bartankiisa, timaha dhexdooda, laga taagto iyo jijin foolmaroodi ah oo cududda lagu xidho. Labada ba ragga ayaa lahaa. – *[T]*
[27] Ab'ogaaga raaska Koofur Afrika dega. – *[T]*
[28] James Bruce. – *[T]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

culus oo af badan faylaha ku jarayaa, waa halka dadka faysha Achiles[29] kaga taal e. Nabarkani judha hore dhutin yar ayuu uun gaystaa, markaa ayaa maroodiga oo u qaba in qodaxi cagta ka mudday cagaha aad dhulka ula dhacaa oo meesha rugaa, ilaa seeddu si fiican u kala go'do. Xayawaankii oo markan curyaamay ayaa dacdarro oon iyo gaajo loo nacaa. Saynta sida Kaafirta oo kale ayaa billad ahaan loo goostaa, foolashana marka qurun jilciyo ayaa la guraa. Afrikada dhinaceedaan maroodiga waligi la ma hebdiyo [ama hebed ma noqdo].

Lix saacadood ayaannu ballaca Dooxada Harawo sii fuushanayn. Dhir badan iyo biyamareenno biyaha kuraha ku gedaaman ka hooriya ayay meeshu lahayd. Meelaha qaarkood karadda biyuhu 20 cagood ayay ciidda hoos u jeexday. Qorarka waxaa ku teedsanaa milk-bush, Asclepias, Carmo, iyo geed qodxeed noocyo badan leh, gaar ahaan gob miro hurdi ah leh. Halkan shimbiro ciiddaa ka badan ayaa balanbaaliso baallahoodu midabbo ifaya leeyihiin halabsanaya. 'Sheekh Indhoole', sida dadku ku magacaabo dakhsiga madow raxan raxan ayuu gacmaheenna iyo wajigeenna ugu degayay marka aannu ag marno. Dhulka sare waxaa aad uga baxay nooc tiin ah oo halkan geed laamo harac ah bixiya ah. Laamihiisa afargeeska macoyda cagaarka tiqda ah e jirmiga leh oo mararka qaarkood 40 cagaood kor u baxa waxay baarka ku sitaan ukurro miro waawayn oo buurbuur midab casaan ifaya ah leh. Marka dhirta loo dhowyahay gembisyo aad u qurxoon oo carriga firirsan ayaa la arkaa. 'Xasaddin'ta waxaa ka buuxa caano jirka guba, Soomaaliduna hoos ayay eegtaa marka ay hoos marayaan laamaheeda. Waxaa la sheegay in maroodigu jecelyahay, waxaana la arkaa meelo badanaa ay feerfeereen maroodiyo gaajaysan. Halka ugu dhow ee ugaar loogu tagaa waa jabaddadii sanadii hore. Ha se yeeshee, meelo laga heli karo oo dhir harac ah iyo geed qodxeed cagaaran oo biyo u dhow leh sina ba loo ma waayo.

Markii aannu dooxada xidhkeeda koofureed soo gaarnay ayuu Buux na la socodsiiyay in haddii la doonno aannu maalintaa oo dhan sii fuushanaan karno, dhulkuna sidaa uun wada yahay. Saylac waxaa la iiga soo sheegay in maroodigu 'sida ciidda' ku yahay Harawo, xataa Gadabuursiga oo ka fog waxay ka maragkaceen in uu sida idaha u daaqo, markii aan annagu ku sari waynnayna waxay ku dhaarteen in ay sanadkii tegay oo qura 30 iyagu dileen. Maroodigu malaha wuxa uu aaday xagga Dooxada Xariirad oo xilli dambe ayaa waxaa soo dejiya qabowga. Gordon Cumming[30]dambe ayaa haddaba ku guulaysan doona halka Xaaji Cabdullaahi sida xun ugu guuldarraystay.

Diseembar 15 ayaa geesigii Buux ahaa, labadiisii walaal, iyo ina adeerki Faahiye kaftanlow u holladeen in ay dooxada naga la gudbaan. Dabadeed markii baqal shan mayl dib u guryanqoday la soo helay, la na xalliyay muran badan oo dhex yiil Shehrazade oo rag rariddii awrta ka jeediyeen iyo Cawar oo ishiisii qudha ahaydi caro uu ka qabo sida ay gabadhu wax leedahay la mirigmirig leedahay ayaannu xagga koofureed afka saarnay. Saacad socodkeed ayaannu ku gaarnay bannaanis kayn aan is haysan oo geed qodaxeed ahi ku hareeraysantahay. Dhexda waxaa kaga yaal qabri

[29] Achiles tendon. – *[T]*
[30] Gordon Cumming wuxuu ahaa ugaarsade Ingiriis ah oo Afrika ku caan baxay. Burton ayay ciidammadii Ingiriiska ee Hindiya mar ka wada tirsanaayeen, "Xaaji Cabdullah" waa isaga Burton ah. – *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

duqoobay oo dabbaaldeggyada lagu qabto, marka Ugaaska Geedka Barakaysan hoostiisa lagu duubayo. Xoolajirro ayaa duurka ka soo baxay si ay noo daawadaan marka aannu gudbaynno, iyaga oo gacanta baryo 'buuri' u taaganaya. Hablihii inamaha ahaa ayaa inta hore isu soo mutuxay yiri 'gabdhow kaalaya amakaaggaan arka!", markii si fiican loo waraystayna jawaab hadal la ma ayan bakhaylin. Badankoodu waawayn ayay ahaayeen, guumayso aan yaraynna waa ku jireen go'doonka qabiilku ku suganyahay darti, maaddaama halkan carriga Soomaaliyeed isguursiga ilma'adeerta laga durko. Dhulka dooxadu waa didib adag oo quruurux si silloon u warani daadsanyahay, kuruhu waa dhagax miiran qararka biyojeexda ah ee dhaaracyada iyo dhagxyada yaryar ahna waxaa ka muuqday heerka biyadhac 10 ilaa 15 cagood inta u dhaxaysa dherer gaara. Dixahaas waxaannu ku aragnay raad isdabajoog ah oo ay deero iyo doofaarro dhigeen.

Toddoba saac oo duhurnimo ayaa awrtayadii iyo gammaankayagii laga waraabiyay laasas ku yaal tog ballaaran oo Janno Gaaban lagu magacaabo. Marinkiisa waxaa la iigu sheegay in uu xagga waqooyiga u aado Dooxada Harawo ilaa Oodla iyo Waraf, laba godeen oo carriga Wayma ee Tajurra agteeda ah dhaca. Qiyaastii saacad barkeed ka dib ayaannu soo gaarnay xero idaad laga guuray oo nasiyadeennii u dambaysay lix mayl u jidha. Markii aannu rarkii furnay ayaannu ku kifaaxnay ceel agteenna ahaa oo aannu ogaannay in biyaha inta ay adayg ka qabaan qofka ku maydha ay jidhkiisa jiriirac xajiin la moodo ka soo saarayaan. Daawada kaliya ee waxan xilka lehi leeyahay waa dhabooq saliid ama subag ah. Waa dawo kahortag oo ay tahay in ayan marna sadcaalayaasha Afrika halmaamin. Marka hore dareenka xaydhu ma wacna, dhawr beri ka dib ayaa se la illoobaa, ugu danbayynna 'salaaxa subagga' sidii beebka ama koobka bunka ah ayaa loogu bogaa. Jirka ayuu qallalylka iyo nabarrada ka jiraa, waxyeellada baas ee kulaylka, qabowga iyo qoyaanka wuu ka hor tagaa, sunta kaneecada ee Proteus-ka bakteeriyada la moodana wuu kala gooyaa. Soomaalidu waligood ma gefaan in ay isku duugaan, marka ay subag heli karaan, Badawiguna raaxo halkii ugu sarraysay ayuu jooga marka uu milicda fariisto ama ba, kulku dadkaan waa u sida xamaaratada e, marka inta uu dab belelaya dhabarka u duwo oo jaalki subag ku dhabooqo oo ku duugo. Dalmariyeyaashaydii baqdin ay libaax ka qabaan ayay xero idaad ka galeen, anigana dhib yaraan la iigu ma dirqin in aan la galo xeradaa.

Laba saac ee subaxii xigay ayaannu kayn aan ilqabad lahayn oo geedqodaxeed ah inta sii jibaaxnay mid ka mid ah buuraha goonida u go'an ee dhulka Soomaaliyeed tilmaamaha la jeclaysto u sameeya afka saarnay. 'Kooraley', eray u dhigma kooraheenna ayaa qaabkeeda magaca isha ka tuuray. Qaanso kooraad[31] iyo dabagelis[32] waxaa u dhigma laba dhadhaab oo dhagaxdixeed ah, dhexdoodana waxaa ku yaal godaan fadhigii ah. Markii maalintii sii kobocday ayuu heerkulkii iska beddelay 50° oo isu rogay halka ugu sarraysa oo ahayd 121°. Qiyaastii shan mayl markii aannu soconnay ayaannu ku hakannay biyamareen ballaaran oo Gallajab [biyo badan] la

[31] Kooraha roggiisa hore ee soo godan. – *[T]*
[32] Dabagelisku waa xarig ama suun kooraha ku xariira oo faraska saynta loo suro, si aanu kooruhu hore ugu durkin. Awrta marka la rarayo xarigaa oo kale ayaa iyagna loo adeegsada. – *[T]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

yiraahdo. Halkaa ayaannu ka qubaysannay oo qado wanaagsan ka dhigannay rati intuu qar ka duulay addin ka jabay. Socodkayagii ayaannu sii ambaqaadnay abbaarihii 11 saac ee galabnimo, annaga oo sii dhex marnay dhul taag ah oo marka roobku da'o dabadeed ay tahay marka uu ugu bacrinsanyahay. Waagii hore Geri ayaa degi jiray, Gadabursiguna aad ayay ugu faanayeen qabsashadiisa. Saacad markii aannu soconnay ayaannu gaarnay cagta Kooraley oo degaandegyadeeda hoose uu ka muuqday lammaane ugaar Alakuud la yiraahdo ah. Waa hebed si fudud loo toogan karo, Badwiduna hamuun wayn ayay u qabaan. Saacad kale oo socod gaaban ah waxay naga tuurtay dix ballaaran oo gebiyo dhaadheer oo dhoobo adag oo heer biyadhig 18 cagood ciidda ka sarreeyaa ka muuqdo, dhir badanna leh. Dalmariyeyaashu waxay ceelashaas/laasaskaa ku tilmaameen Agjoogsi, waa magac guud oo muujinaya in biyuhu meel dhow joogaan e.

Markii aannu dixda dhaafnay, kur ayaannu u baxnay oo dhaladeeda ugu tagnay degmo wayn oo lo'i diiqalyaynayso. Dadkii degganaa ayaa nagu soo yaacay, si ay noo daawadaan, dumarkuna erayo la yaab muujinaaya ayay naga lahaayeen. Tii ugu qurxoonayd ayaan beegsaday oo buntukhaygii salaam uga riday dusheeda. Dadkii oo faraxsan ayaa ku dhawaaqay"Mood! Mood!", annaguna waxaaannu dhawaaq ku jawaabnay"ku liibaan[33]."

Galabnimadii 11 saac, markii aannu shan saacadood soconnay ayaa awrtii jabad laga guuray oo ooddiisa dhaadheeri cabsi subaac laga qabay muujinayso lagu furay. Tirooyinka lo'da ah ciidankooda ayaa libaax naga jiray, laakiin maalin ka hor uun ayuu libaax gabar aqalkeedii ka jiitay, lugaheedii mid ka mid ah oo kali ah ayaa duug Islaam lagu sameeyay. Badwi Caddow la yiraahdo oo aannu seesi[34] ahaan u qorannay ayaa lagu amray in uu habeenka hees ku idleeyo. Sida waardiyeyaasha Soomallida caadada u ah waa in uu isagu cod isku la sheekaystaa oo mid ka duwan isugu jawaabaa, si uu tuugada ugu qanciyo in rag dhowr ahi meesha waardiye ka hayaan. Dabka ololaya marka uu ag fadhiyo arag cawaaneed ayuu leeyahay, farxaddiisa dharaareed, wehelkiisa iyo ilaaladiisa habeenku waa tallaabada kaliya ee uu kaga horreeyo daayeerrada walaalihi ah.

Afar maalmood ayaannu Agjoogsi ugu xayirnayn Garaad Adan oo iman waayay darti. Daahiddaan ayaa i siisay fursad aan dusha uga baxo Kooralay oo qiyaastii hal mayl u jirtay meesha aannu degganayn. Haddii aannu dhagaxdii iyo boholihii gosheeda sii dhex taagtaagsannay, waxaannu u tagnay fariisinno lafo lo'aad la qubay, dufantiryo cusubina waxay muujinaysay in meesha mar dhow uun ay qolo ka guureen. Carrigan libaaxu waa dhif in la arko, in xaskiisa jiqda ah looga naxsado mooyee. Intii aan sadcaalka ahaa, in kasta oo marar cidiisa la maqlayay habeen oo dhan, mid qura uun ayaan arkay.Dadku boqorka subaaca waxay ka qabaan ciraanays ah in uusan soo weerarin sadcaale kaligi ah, maxaa yeelay qofkaasi ayay yiraahdaan libaax oo dhan kii ugu waynaa ayuu dilaa. Waa xayawaan gabbada oo ay dadku ka qabaan baqdin aad

[33] Erayada 'mood' iyo 'ku liibaan' waxaa loo adeegsadaa debbaaldegyada fardoolaydu ka qayb gasho, sida caleemasaarka ugaasyada iwm. Erayga hore waa salaan sharaf, kan dambana waa jawaabtiisa. – *[T]*
[34]Qofka gammaanka xannaanadiisa, daajintiisa iwm ka shaqeeya . – *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

uga yar tan ay ka qabaan haramacadka caraysan ee xoogga leh, marka laga reebo xilliga gudcurka ah iyo marka subaaca hilibcunka hororka ah ee duufaannadu kiciyaan ay soo baxaan. Maadaama uusan awoodin in uu xawli ku ordo marka gaajo ku dillaacdo, koox socoto ah ayuu aayar sidii mukulaashii u raadguraa oo markii uu u soo dhowaado soo boodaa, kan ugu dambeeyana inta rito jiqda u qaataa.

Kooraley dhaladeeda sare waxaa si wacan nooga muuqday dhulka ku hareeraysan. Ugu yaraan afartan degmo oo badankooda laga guuray ayaa inta ishu qabato ku yiil. Dhinacyada oo dhan, waqwooyi-galbeed iyo koofur-bari ma ahee inta kale waxay ahaayeen dhagax madow iyo kuro dhagaxdixeed ah. Halka ay maraan dooxooyinku oo ay dhowr seere kala dhex maraan waxaa ku astaysnaa cagaar doog qoyan ah, bananka firiqsanina sidii gaashiyo dhulka saaran ayay hurdi la dhalaalayeen. Waa saamaynta ay reebeen didib iyo nagaar, iyada oo isla markaana ceeryaamo fudud oo goobaabin midab lafcir iyo qalin isku dheehan leh ku ekaysay meesha. Halkan Yawmul Qiyaame waxaa uga dhalatay fikradda ah in boqorkii dalkan uu ii caleemo saaro. Isagoo kor buh! buh! buh! u leh ayuu caleemo geedxabkeed iyo biyo yar oo ubbo weeso ku jiray madaxa dushiisa igaga rusheeyay, dabadeedna si khushuuc u dhanyahay duubka iigu xiray. Malaha nasiib wanaag ayay ahayd in aan kaftankaa cidina arag. Shamuum badwi ah ayaa kurta cagteedii soo dhoobtay iyaga oo, sida dhacda, fal ka shakisan. Haddiise ay runta ogaan lahaayeen, socdaalkayagu waxaa dhici kartay in uu degedeg u soo af jarmi lahaa. Soo degaandeggii waxaa aan helay mudacyo caanaqub[35] oo tiro badan, waxaana kale oo aan toogtay qoollay Ceelaljoog la yiraahdo. Salka buurta 'Bawne' kii Falastiin u eg ayaa ka muuqday, isaga oo dhagxyada dushooda ku qorraxaysanaya, waa madadaalada uu ugu jecelyahay e.

Galabtii Diseembar 20 ahayd ayuu dhambaalsidihii faraska ku joogay soo laabtay, lix saac oo cirbin adadg ah dabadood, isaga oo wada warqaddii aan Garaadka u qoray oo aan la furin iyo farriin gaar ah oo ka timid ilma Cali Cadde walaashood oo ku talinaysa in ayan meeshooda soo dhaafin. Shir xasaasi ah ayaa dabadeed madaxa la is gashaday. Waxay u muuqatay in Garaadka oo qarka u saaran in uu faras soo kooraysto ay dadkiisii ku dhaariyeen in uu negaado oo uu xalliyo khilaaf iyaga iyo Amiirka Harar u dhaxeeyay.

Si ay ahaataba, abbaannadii waxay la noqdeen awrtoodii kirada ahayd, si cadna u diideen in ay na weheliyaan, iyada oo Buux uuYawmul Qiyaame si qarsoodi ah u ogaysiiyay in aan dhulkan ku yeeshay magac baas oo iigu baxay aniga oo wax walba laynaya, maroodi ilaa shimbirta hawada sare lasha. Walaalaha yaryar midkood , dhab ahaan waxa uu ka markhaati kacay in aannu bayaxawyo khayr bilowgi ah nahay haddii Garaadku tin koryaga ku taal wax gaarsiiyana uu Geri waxa adduunka jooga dhammaan dhegta dhiigga u wada dari doono. Hore ayaan se u barannay, si ay ahaataba, in aannaan u bixin bootadaas. Yawmul Qiyaame ayaa si xifaale ah wuxuu

[35] Soomaalidu waxay ku magacaabaan Xiddig ama Caanaqub. Mudacyada waxaa loo adeegsadaa in madaxa lagu xoqdo [firin], Cadanna iib ayaa loogu dhoofiyaa. – *[B]*
[Xiddig ama Xiddigdhuleedda (kuuleey) iyo Caanaqubtu (kashiito) waa laba xayawaan oo kala duwan, tan mudacyadeeda firinka laga dhigtaa waa Caanaqubta. – *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

ugu jawaabay in hadalladoodu malab yihiin ficilladooduna malmal. Maadaama ay qabiil gun ah oo aan ceebta ka sarriigan yihiin, k ama ayan soo jawaabin guulguuliddayadii. Ugu dambayntii xeelwareejin kale ayaa miro dhashay. Buux iyo walaalihi oo sidii carruur caraysan hadba kadaloobsanya mahad celin ayaa iyaga aayar lagu fasaxay, waxana aanu soo jeedinnay in aan hoos tagno maganta Garaad Xirsi, waa garaadka Bartire e. Tani waxay xoolihii abbaaninta markii hore loogu talo galay seeddigood gacanta u gelin lahayd nin ay xiniftan lahaayeen, sidaana qaraarkoodiina in ay beddelaan ayay ku kalliftay. Mugga waxaa na soo booqday laba wadaad, Aw Samatar iyo Aw Nuur, laba dhoohaneyaal ah, se yara firfircoon oo naxariis leh. Kan hore cimaamad uskag leh ayaa uu xirnaa, kan kalena koofiyad Zaabidi ah, waa koofiyad falkis ah oo cawda falliiq dhexaadkeeda adag laga sameeyay. Waxay siteen masallayaal harag riyaad ah oo ay salaadda ku tukudaan, garbaha midig waxaa ka lushay ubbooyin geed laga qoray oo khadi ku jirto iyo Loox tahliisha lagu qoro, bidixna waxaa ka lusha kiish dufan leh oo uu ku jiro kitaab Qur’aan ah oo rifrifan iyo MS[36] yar oo ducooyin ah. Si fiican ayay wax u akhrin karaan, se Carabiga ma aanay fahmayn. Waxaan u hadiyeeyay nuqullo rakhiis ah oo Qur’aanka Kariimka ah ee Bombey lagu daabacay ah. Tirada shaqalaawayaashani marka aannu Harar oo ah halka carriga Soomaaliyeed laga soo aflaxo u sii dhawaannaba waa ay korortaa. Dadku sidaa u ma sii dhegaystaan taladooda, se markan Aw Samatar wuxuu ku guulaystay in uu ku qanciyo geesigii Buux ahaa in aysan khatartu mala'awaal uun ahayn.

Ka dib, durbadiiba, waxaa xeradayadii yimi fardooley saddex ah oo noqday wiilashii Aadan, Ugaaskii mustaqbalka ee qabiilka Gadaabursi. Ugaaskani si buuxda ayuu u garansanaa faa’iidoonyinka ay leedahay furitaanka waddada ganacsiga ee ay xayireen xurgufaha aan sidaa u sii buurnayn ee u dhaxeeya dadka, sidaana farriinta u soo diray isaga oo leh in xushmadda uu Xaaji Sharma’arke u hayo darteed uu haddii ay wiilasha Cali Cadde ka baqaan in ay na dalmariyaan uu isaga qudhiisu hawshaa gudanayo. Halkaa ayuu Buux ‘Geesi’ku noqday, sida Yawmul Qiyaame carrabdadab ahaan ugu magacaabay. Dib ayuu walaalihiis, fardahoodii iyo awrtoodiiba inta dib u celiyay si geesinimo leh isugu diyaariyay in uu dalmariyahaga noqdo. Si xifaale ah ayaan u wayddiiyay waxa uu hadda ka qabo khatarta nagu soo fool leh. Jawaabtiisii oo dhan wuxuu ku soo koobay in uu ku celceliyo oraah badawida oo sida Carabta oo kale cabsi daran ka qaba magaalooyinka ay maalin walba dhegaha iiga qaylyayeen, ‘jirkaagaas cad Harar bay ku hallayn doonaan!’

Diseembar 21, markii ay saacaddu ahayd sagaal saac oo galabnimo ayaannu xagga galbeed u dhaqaaqnay, annaga oo karin kuraha dhexdooda ah ka dusnay oo markan koofur-galbeed isugu jimbacnay dhul si dhakhso ah kor ugu kacaya aadna loo deggenyahay oo meesiyo iyo tirooyin xoolo ahi hareeyeen. Galabnimadii 11 saac, socod laba mayl ah dabadi, ayaannu aqalkeennii ka taagganay xero dad badani deggenyahay dibaddeeda, neef ido ahna waxaa noogu deeqay Aw Samatar, ilaa waqti dambena olol dugsoon ayaannu ku cawaynnay. Subixii dambe horraantiisii ayaannu

[36] Waxay u taagantahay waxa af Ingiriisiga “manuscript” lagu yiraahdo oo noqon kara qoraal ama gacanta caadiga ah lagu qoray ama firiqsan oo aan kitaab jalladan ahayn. – *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

rajaynaynnay in aan dhaqaaqno. Ha se yeeshee, biyo la'aan ayaa jirtay, safarro aan badnaynna si aayar aayar aha ayay isu soo tarayeen. Waxyaalahaas ayaa na daahiyay ilaa 10 saac oo galabnimo. Jidkayagu wuxuu ku aaddanaa xagga galbeed oo uu sii maro dhul taag ah oo ku beegan kur iska muuqata oo Konti la yiraahdo. Awrta ma jiraan wax uga daran xatabadaha dhagaxa ah ee buurta cagteeda ku yaal. Waa xirmooyin ay dixo dhaadheer jaraan, biyamareenno halis ahina ay ku badanyihiin. Rarku markan marna gadaal ayuu u siibtaa marna horay, mararka qaarna waxa uu ku sigtaa in xanan la haro. Ugu dambayntii waxaannu ku qasbanaannay in aannu rati dib u dhigno si uu tartatiib noo soo daba galo. Laba mayl markii aannu sii siqaynnay dabadeed ayaannu ku hakannay xero lo'aad laga guuray oo *cirka qaawan* hoos seexannay, maadaama ay kuraha hoostoodu diirrannayd. Galabtaas safarkeenna waxaa ku soo biiray inan Gadaabursi ah oo heeran[37] ahayd. Shehrazade iyo Deenarzade inantaa waji furan ku ma ayan soo dhowayn, waxaan se ku adkaysannay in cunno laga dharjiyo, annaga oo hawshaa korjoogto ka ahayn. Habka ay cunnada u cunaysay wuu silloonnaa oo sacabkeeda ayay bariiska ka leefaysay. Subaxii xigay waxaa annaga oo maqan iyana ay si xun u diiddantahay la baxay niman tolkeed ah oo ku raad joogay. Haddana, aniga oo Gadabuursi nabadey leh, muuqaal yar ayaan kaa siin doonaa qabiilka:

Gudabiirsi ama Gudaabursigu waxay sheegtaan Dir iyo Iiddoor, sidaana in ay Ciisaha xigto la yihiin ku sheegtaan. Dad kale waxay sheegaan in qabiilkoodu yahay laan Bah Gobada Habar Awal ah oo wagoodii hore deggenaa Jabal Almis agtiisa iyo xeebta Buulaxaar. Soomaalidu si aan gabbasho lahayn ayay garacnimo iyo fir gumeedn ugu dhalleeceeyaan. Abtirisyaqaan caan ah ayaa mar ii sheegay in ay Midgaha ama addoomaha wax yar uun dhaamaan. Hooyadii farcooda waxaa la sheegaa in ayan magacaabi karin wiilkeeda aabbihi. Qaar waxay soo jeediyeen in la dilo, kuwa kalana in la daayo, iyaga oo leh, 'abbooyaalow maan isaga biirsanno.'[38] Sidaa ayaa qabiilka magaciisu ku baxay.

Gadaabursigu waa nahaabyo beentu lafaha degtay oo aan tirada ku qiyaasi karo inta 3000 ilaa 10,000 u dhaxaysa. Waxay degaan dhulka dhagaxa iyo labarogyada siman ah ee isugu jira kur qodax leh iyo tog caws leh ee ka sarreeya aagga hore ee silsiladda buuraha ah ee badda xaggeeda dhacda. Xagga Harar ayay xoog ugu dhul ballaarsadeen, halkaa oo hadda bancawska Maraar uu soo xeero. Sida caadada ah, waxay u kala baxaan laamo fara badan.[39] Xagga muuqaalka Gadaabusrigu si muuqata ayay uga sitaan Ciisaha deriskooda ah. Wajiyo qurxoon ayaan ku arkay raggooda iyo dumarkoodaba. Qaarkood waxay ba soo hollinayaan qaabka Qawqaaska.[40] Nin oday ah

[37] Heeran waa inan gabarnimo ku waynaatay oo meel kale oo aan reerkoodu deggannayn u guur iyo geyaan doonata. – [T]

[38] Taariikhda iyo magaca dhabta ah ee qabiilku sidaa kutirikuteenta aan raadka lahayn ah aad ayay uga duwantahay. – *[T]*

[39] Cayaal Yoonis, jilibka ugu wayn, wuxa uu ka koobanyahay afar lafood. 1. Jibriil Yoonis. 2. Nuur Yoonis. 3. Cali Yoonis. 4. Aadan Yoonis. Jilbaha kale ee waawayn waxa ay kala yihiin; 1. Mikaahiil Dheere. 2. Reer Ugaas. 3. Jibraa'iil. 4. Reer Maxammad Casse. 5. Muuse Fiin. 6. Reer Abbokor. 7. Bassanah [?]. 8. Bah Habar Xasan. 9. Cabdillaahi Mikaahiil. 10. Xasan Mikaahiil. 11. Aayah Mikaahiil. 12. Bassanah [?] 13. Xasan Waraabe. *[B fn.]*

[40] Dadka caddaanka ah eeYurub iwm. – *[T]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

oo gibilkiisu midabka saytuunka u egyahay, xirribo hoolan, timo cad oo madaxa hareerihiisa galoolan, qadaad dheerna leh waxa aan laga aqoon raggii Anglo-Indianka. Guud ahaan se,, afka ballaaran ayaan firkooda Afrikaan fashila, calalinta tubaakada ay magaadka darsadaanna ilkaha ayay miririsaa, cirridka madoobaysaa, bushimahana waa ay giirgiirtaa. Midakoodu waa shaah caddayska Xabashiga oo ka yara cas gibillada gubtay ee xeebta, timaha oo aad subag qadhmuun loogu dhabooqayna gadaal ayay u dhacsanyihiin iyaga oo daliigo dhuudhuuban, dhaadheer, galgaloolan ah oo midabka dhogorta eyda pointer-ka Ruushka[41] leh. Qaabdhismeedku wuxuu u dhawyahay gaabnaan, laakiin ballaaran oo lixaad leh.

Gadabuursigu laystaannimada iyo maaro u waaga waa ka la mid, inkasta oo ayan sida Ciisaha dhiigyacabyo caddaystay ahayn. Ugaaskoodii geeriyooday, Rooble, ee Reer Samatar wuxuu ka tegay waraso aan xukunka xagsan karin. Duubka dartii ayaa mar waxaa talada marooqsaday lafta ay iska soo hor jeedaan ee Reer Cabdillaahi, halkaana dagaal sokeeye ayaa ka dillaacay. Inta xaqnimada xukunka  jeceli waa ay ku raaxaysan doonaan haddii ay maqlaan in markaan waddanka ka soo tegay uu Geelle, waa wiil uu dhalay Ugaas Rooblihii hore e, ay u dhawayd in uu xukunkiisii dib ula soo noqdo. Qofka socotada ah naftiisa marka loo eego, qabiilkan dhexdiisa waa ku aammin, inta uu quudinayo oo abbaanisna siinayo, xataa hub la'aan ayuu socon karaa. Ha se ahaatee, waa beenlowyaal, xataa marka Soomaali dhexdeed loo eego, faanlowyaal Bobadilladoodu[42]tuugo caddaysatay tahay iyo dawarsadayaal yabooh badan oo dhuungala ah. Waxaa qalbigooda ku jira afmiishaarnimo hadal macaan oo ay dhif tahaya in la garto, marka maro ama tubaako ay arrintu khusayso mooyee. Ha ku daaline, 'munaafaqnimadu waa u sida neefsashada.' qoladan Mid ugaasyadooda ka mid ah ayaannu 'ey' ku sheegay, isaga oo haba yaraatee aan inna ba ka dhiidhin.[43]

Ganacsiga meelahaan miyigaa ah hadda xaalad nuxuus ah ayuu ku suganyahay, hadii jidadku nabad ahaan lahaayeen se isusocodka ganacsi ee xeebta waa lagu dhiirran lahaa. Tusaale ahaan, faa'iidada hargaha Cadan lagaga helo waxay ahaan lahayd shilin shilin saaran, ha se ahaatee, jidku waa khatar xayiraadduna waa joogto. Taa darteed, faa'iidadu khatarka iyo wakhtiga lumaya u ma qalanto. Dhakhso wax safar ah loo ma qalqaalin karo, sidaa darteedna baahida badeecadaha kala duwan loo qabo la ma dabooli karo. Waxa Laing [?] Waqooyiga ka falo malaha Afrikada Barina waa lagu dayi karaa. Halkan xaalkeedu waa uun 'degdegsiinyaha aad is tiraahdo hawl ku qabo ayaa kuu qoonsan kara ka miradhalinteeda [degdegsiiyo door ma dhalo].' Ma jirto meel halkan sabir looga baahi badanyahay si shaqo hufan loo qabto.

---

[41] Nooc eyda ka mid ah ayaa Russian Pointer la yiraahdaa.  Wuxa uu ka soo jeedaa sinjiga guud ee eyda Pointers-ka la isku yiraahdo ee dhogorta cufan leh. – *[T]*

[42] Bobadil (Captain Bobadil), qareen (character) faan iyo isgiijin badan oo ku jira sheeko uu qoray qoraaga caanka ah ee Charles Dikens. – *[T]*

[43] In ugaas beeleed ey lagu sheego waa wax aad u xun, se wuxa uu illowsanyahay in uu magan u yahay dadka uu ugaaskooda caayayo. Xeerka maganta Abbaanka oo aad u adag ayuu ku badbaaday, isagu se wuxuu u qabaa in ay doqonnimo ka tahay ugaaska. Waxaa kale oo dhici karta in aan la garan waxa uu yiri ama la maqal marka u caytamayay. *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Hantida Gadabuursi wuxay guud ahaan ka koobantahay lo’, hargo, faleen iyo subag. Dameeruhu waa yaryar ciiro leh oo tabar yar. Geelu waa waawayn habacsan oo caajis ah. Lo’du waa xoolo qurux badan oo tuuro yaryar iyo geeso dhaadheer oo lo’dii Damara[44] la moodo leh. Marka ay caws heshana waxay yeelataa majo duubiyu giraamanyihiin oo cayilan. Waxaa kale oo jira nooc waawayn oo aan tii Tuscany waxba ka duwanayn. Waxa wax lagu kala iibsado waa go'a baftada qallafsan ah ee Cadan ilaa saddexda shilin ka jooga oo halkan qiimahiisu labalaabmo. Qiimaha neef geel ah oo wanaagsani waa lix ilaa siddeed go’, hal go' wuxuu gooyaa qaalin lo’ laba jir ah, saddexna waxay goysaa sac saddex ila afar sano inta u dhaxaysa jira. Laxdu waxay joogtaa maro barkeed. Neefka riyaha ah, in kasta oo sida Soomaalidu u haysato hilibkiisu nafaqo leeyahay, halka ‘hilibka iduhu cudur yahay’, wax yar ayuu ka rakhiisanyahay idaha. Hargaha iyo saamaha badanaa waxaa lagu kulmiyaa Harar oo laga dhoofiyaa. Xagga xeebta milix ayaa lagu hooriyaa, sidaana cadan loogu qaadaa. Haragga lo’du wuxuu gadmaa rubuc-doollar ama maro hal shilin u dhiganta, laba doollarna waa qiime ay kurjad ama labaatan hargo ari ahi cirmar ku yihiin. Dadka dhulka gudaha ah ee xeebta ka fog deggani hab aan horumarsanaynoo ay u hargaha magdadaan ayay leeyihiin. Haragga way radiyaan, dhamooqaan, dabadeedna midab casaan ah uga aslaan geedka Jirmah [?] la yiraahdo. Ugu dambayntii, gacanta ayaa lagu jilciyaa.

Xagga xabagta tan ugu rooni waa tan Cadaadda. Ganacsatada ajanabiga ahi waxay ku iibsadaan qiyaastii nus doollar faraasiladdii ama labaatankii rodol. Subagga lo’da iyo idaha 32 rodol waxay goyn kartaa maro doollar joogta. Shaygaan wanaagsan ee laga ganacsado waa saafi marka miyiga gudaha ah la joogo, halka xagga Berbera marka la joogo se ay Habar Awashu inta aan la dhoofin bari idaad oo la shiilay ku baraxdo. Waxyaalaha dhulka aannu marnay aadka looga baahanyahay waa marada baftada adag ah, tubaako Suurat, kuulo, iyo gambada lafcirka ah ee dumarku xirto. Dadku waxay kale oo aad ugu rayn lahaayeen wixii qoodhin ku kordhin kara fardahooda. Markii aan Cadan joogay waxaan ku fikiray in aan xoogaa sengeyaal Carbeed oo duqow ah kaxeeyo oo hadiyad uga dhigo ugaasyada. Nasiibwanaag, hawshaasi waa kala daadatay, faras aan hore loo baran oo qorux iyo tamar aan dhulalkan la aqoon lihi socodka safarka ugu horreeya ayaa lagu xadi lahaa.

Filo cubka xiga, buugga oo dammina waa dhow ayuu soo bixi doonaa ee la socda. Wixii talo, tusaalayn, sixid iyo xusuusin ah aad ayaa loo soo dhawaynayaa, mahad mug lehna waa laga naqayaa.

Mahadsanidin

Tarjumo & Tifaftir Boodhari Warsame
Email: Bodhari.warsame@gmail.com

---

[44] Carri Hindiya ka mid ah. Tuscany waa gobol Talyaaniga ka tirsan. – *[T]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

*Boodhari waa qoraa tarjumay ama gacanta ku haya buuggaag badan oo qiimo taariikheed ku leh Soomaaliya. Waxa uuna si joogto ah qoraaladiisa ugu soo ban dhigaa degelka WardheerNews.*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**